GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review and Implementation Commission

GUDDIGA DIB-U-EEGISTA IYO LA-SOCODKA HIRGELINTA DASTUURKA

# WARBIXIN

## FAAHFAAHINEYSA SOOJEEDINTA WAX-KABADDELKA CUTUBYADA 1AAD, 2AAD, 3AAD IYO 4AAD EE DASTUURKA KMG AH.

FEBRAAYO, 2024





**DIYAARIYEY:**
GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)

**ANSIXIYEY:**
GUDDIGA DIB-U-EEGISTA IYO LA-SOCODKA HIRGELINTA DASTUURKA

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Guddiga Dib u Eegista iyo La-socodka**
**Hirgelinta Dastuurka**

جمهورية الصومال الفدرالية
لجنة المراجعة ومراقبة
تنفيذ الدستور

**Federal Republic of Somalia**
**The Constitution Review and Implementation**
**Oversight Committee (OC)**

Ref: GLD/BFS/....../02/2024 TAR: 10, Febraayo 2024

**Ku:** **Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS**
**Ku:** **Guddoomiyaha Aqalka Sare BFS**
**Og:** **Wasiirka Wasaaradda Caddaalaadda iyo Arr. Dastuurka, XFS**
**Og:** **Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka**

**Ujeeddo:** **Soo Gudbin Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka.**

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka ee BJFS wuxuu si waafaqsan Qodobka 133(10) ee Dastuurka KMG, Qodobka 108aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka, Qodobka 81aad ee Xeer Hoosaadka Aqalka Sare iyo Qodobka 1(3) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka halkan idinku soo gudbinayaa Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG iyo Warbixinta la socota.

Soojeedimaha cutubyadan waxaa soo diyaariyey Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista Dastuurka waxaana ansixiyey Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka si waafaqsan Qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka, iyo Qodobka 3(1)(2) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Mudane Guddoomiye, Guddigu inta uu ku guda jiray diyaarinta soojeedimahan, waxay hay'adaha u xilsaaran dib-ueegista dastuurka latashi la sameeyeen culumada soomaaliyeed, si guddiga uu u dhageysto talooyinkooda iyo fiirooyiinka ku aaddan wax-kabeddelka cutubyadan.

Ugu dambayn, Mudane Guddomiye, guddiga wuxuu diyaar u yahay inuu dhagaysto tallooyiinka iyo fikradaha xildhibaannada labada Aqal ee BFS ee ku aaddan wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah, si waafaqsan Qodobka 4(1) ee ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Iga guddoon salaan iyo qadarin

Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf 'Xuseen Iidow'
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka
Dib-u-eegista Dastuurka BFS

BARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GUDIGA DIB U EEGIDDA IYO LA SOCODKA HIRGALINTA DASTUURKA

**Lifaaqyo:**

1. Soojeedimaha Wax-Kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka KMG ah
2. Warbixin Faahfaahineysa Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah.

**Summad:** GMDHD/GG/131/24

**Taariikh:** Febraayo 8, 2024

Ku: Guddoomiyaha Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka BFS

Og: Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee BFS

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BFS

Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arr. Dastuurka

Ujeeddo: Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka iyo warbixinta la socota

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Madaxabannan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka "GMDHD", waxaa sharaf u ah in si waafaqsan Qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka KMG ah iyo Qodobka 3(1) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta wax-kabeddelka Dastuurka, uu halkaan kuugu soo gudbiyo soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka iyo warbixinta la socota.

GMDHD oo tixraacaya warqadaha ku kala taariikhsan 26/7/2023 iyo 25/12/2024 oo dhammaantood aad ku soojeediseen taallooyin iyo in la sameeyo cilmibaarisyo dheeraad ah iyo latashi culimmada soomaaliyeed, iyo kulamadii dhowrka ahaa ay wada yeesheen labada guddi, wuxuu cutubyada 1aad ilaa 4aad ku soo dhafay fiirooyinka Guddiga Lasocodka iyo talooyinka culimmada Soomaaliyeed, sidoo kale wuxuu soo diyaariyey daraasad iyo cilmibaarisyo ku abbaaran cutubyadan sida aad ka arki doontaan warbixinta guud ee la socota soojeedimaha.

Ugu dambeyn, GMDHD waxaa u sharaf ah in soojedimaha wax-kabeddelka dastuurka cutubyadiisa 1aad ilaa 4aad iyo warbixinta la socota loo gudbiyo labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si ay uga gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah.

Avv. Burhaan Aadan Cumar
Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee
Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

**Lifaaqyo:**

(1) Soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah; iyo
(2) Warbixin faahfaahineysa soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah

**Tusmo**

Kalmadda Guddoomiyaha ..... 4
Guddiga Dib-u-eegista iyo La socodka Hirgelinta Dastuurka ..... 4
Kalmadda Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ..... 5
1. Hordhac ..... 6
1.1 Diyaarinta Cutubyada 1aad ilaa 4aad ..... 6
1.2 Habraaca Diyaarinta Wax-kabeddelka Loo Maray ..... 6
1.3 Noocyada Wax-kabeddelka ee uu sameeyey GMDHD uuna Ansixiyey ..... 7
1.4 Heshiisyada Siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaran ..... 8
2. Faallada iyo Sharraxaadda Wax-kabeddelka Cutubka 1aad ..... 10
Cutubka 1aad: Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ..... 10
2.1 Qodobka 1aad: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ..... 10
2.2 Qodobka 2aad: Diinta Dalka ..... 11
2.3 Qodobka 3aad: Mabaadi'da Aasaasiga ah ..... 12
2.4 Qodobka 4aad: Sarreynta Dastuurka ..... 13
2.5 Qodobka 5aad: Afka Rasmiga ah ..... 14
2.6 Qodobka 6aad: Calanka iyo Astaanta Qaranka ..... 14
2.7 Qodobka 7aad: Geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ..... 15
2.8 Qodobka 8aad: Shacabka iyo Jinsiyadda ..... 17
2.9 Qodobka 9aad: Magaalamadaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ..... 19
2.10 Xulashooyinka Maqaamka Caasimadda. ..... 20
2.11 Tusaalooyinka Caasimadaha Dalalka Federaalka Ah: ..... 21
2.12 Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 1aad ..... 22
2.13 Jaantuska 1aad: Natiijada Wax-kabeddelka Cutubka 1aad ..... 23
3. Faallada iyo Sharaxaada Wax-kabeddelka Cutubka 2aad ..... 24
Cutubka 2aad: Xuquuqda Asaasiga ah iyo Waajibaadka Muwaaddinka ..... 24
MADAXA KOOWAAD: MABAADI'DA GUUD EE XUQUUQDA AADANAHA ..... 24
3.1 Qodobka 10aad: Karaamada Aadanaha ..... 24
3.2 Qodobka 11aad: Sinnaanta ..... 25
3.3 Qodobka 12aad: Dhaqangelinta Xuquuqda Asaasiga ah ..... 26
MADAXA LABAAD: XUQUUQDA, XORRIYAADKA AASAASIGA AH EE QOFKA IYO XADDIDAADOODA ..... 26
3.4 Qodobka 13aad: Xaqa Nolosha ..... 26
3.5 Addoonsi, Midiidin iyo Ku-shaqaysi Qasab ah ..... 27
3.6 Qodobka 14aad: Xorriyadda iyo Nabadgelinta Qofnimada ..... 27
3.7 Qodobka 15aad: Xorriyadda Ka-midnoqoshada ..... 28
3.8 Xorriyadda Diinta iyo Caqiiddada ..... 28
3.9 Qodobka 16aad: Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta ..... 28
3.10 Qodobka 17aad: Xurmada Hoyga ..... 28
3.11 Qodobka 18aad: Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsi-wadareedka ..... 29
3.12 Qodobka 19aad: Xorriyadda Isu-socodka iyo Degitaanka ..... 29
3.13 Qodobka 20aad: Xaqa Ka-qaybgalka Siyaasadda ..... 29
3.14 Qodobka 21aad: Xorriyadda Xirfadda, Shaqada iyo Mihnadda ..... 29

3.15 Qodobka 22aad: Xuquuqda Shaqaalaha....30
3.16 Qodobka 23aad: Deegaan iyo Bii'ad Nadiif ah....30
3.17 Qodobka 24aad: Hantida Gaarka Loo Leeyahay....31
3.18 Qoodbka 25aad: Xuquuqda Bulshada....31
3.19 Qodobka 26aad: Daryeelka Qoyska....31
3.20 Qodobka 27aad: Xuquuqda Carruurta....32
3.21 Qodobka 28aad: Waxabarashada....35
3.22 Qodobka 29aad: Dhaqanka iyo Afka....36
3.23 Qodobka 30aad: Xaqa Helidda Xogta....36
3.24 Qodobka 31aad: Xaqa Ilaalinta Xogta Shaqsiga....37
3.25 Qodobka 32aad: Go'aanno Maamul oo Caddaalad ah....37
3.26 Qodobka 33aad: Xaqa Dacwadda iyo Isdifaaca....38
3.27 Qodobka 34aad: Xuquuqda Eedaysanaha....38
3.28 Qodobka 35aad: Isucelinta Eedaysanayaasha iyo Dembiilayaasha....39
3.29 Qodobka 36aad: Qaxootiga iyo Magangelyada....40
3.30 Qodobka 37aad: Xaddidaadda Xuquuqda....40
3.31 Qodobka 38aad: Dib-u-xaqsooridda La Xiriirta Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha....40
3.32 Qodobka 39aad: Fasiraadda Xuquuqda Asaasiga ah....41
3.33 Qodobka 40aad: Guddiga Xuquuqda Aadanaha....41
MADAXA SADDEXAAD: WAAJIBAADKA MUWAADDINKA....42
3.34 Qodobka 41aad: Waajibaadka Muwaaddinka....42
3.35 Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 2aad....42
Jaantuska 2aad: Natiijada Wax-kabeddelka Cutubka 2aad....43
4. Faallada iyo Sharaxaada Wax-kabeddelka Cutubka 3aad....44
Cutubka 3aad: Dhulka, Hantida iyo Deegaanka....44
4.1 Qodobka 42aad: Dhulka....45
Daraasad ku saabsan Dhulka....46
4.2 Qodobka 43aad: Guddiga Qaranka Madaxbannaan ee Dhulka....48
4.3 Qodobka 44aad: Xubnaha Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka....49
4.4 Qodobka 45aad: Shuruudaha Xubinnimada Guddiga....49
4.5 Qodobka 46aad: Kheyraadka Dabiiciga....49
4.6 Qodobka 47aad: Deegaanka....50
4.7 Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 3aad....51
Jaantuska 3aad: Natiijada Wax-kabeddelka Cutubka 3aad....51
5. Faallada iyo Sharaxaada Wax-kabeddelka Cutubka 4aad....52
Cutubka Afaraad: Matalaadda Shacabka....52
Lafaguridda iyo Falanqeynta Heshiiska Hannaanka Doorashooyinka JFS....52
5.1 Qodobbada Heshiiska....52
5.2 Saamaynta Heshiiska uu ku yeeshay Cutubyada Dastuurka....52
5.3 Qaybaha Heshiiska....53
5.4 Qodobka 48aad: Awoodda Shacabka....54
5.5 Nidaamka Doorashooyinka iyo Xisbiyada....55
5.6 Qodobka 49aad: Mabaadi'da Guud ee Doorashooyinka....55
5.7 Qodobka 50aad: Nidaamka Doorashooyinka....55

5.8 Qodobka 51aad: Hay'adaha Sida Tooska ah Loo Dooranayo ....................56
5.9 Qodobka 52aad: Muddada Xilhaynta ....................57
5.10 Qodobka 53aad: Codbixiyaha ....................58
Sababaha Xisbiyada Loogu Nidaaminayo Dastuurka ....................59
Qaybaha Nidaaminta Xisbiyada ....................59
5.11 Qodobka 54aad: Dowrka Xisbiyada Siyaasadeed ....................63
5.12 Qodobka 55aad: Shuruudaha Xisbiyad Siyaasadeed ....................63
5.13 Qodobka 56aad: Tartanka Xisbiyada Siyaasadeed ....................64
MADAXA AFARAAD: MAAMULKA DOORASHOOYINKA ....................64
5.14 Qodobka 57aad: Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha ....................64
5.15 Qodobka 58aad: Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha ....................64
5.16 Qodobka 59aad: Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha ....................65
5.17 Qodobka 60aad: Shuruudaha Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha ....................65
5.18 Qodobka 61aad: Muddada Xilhaynta Xubnaha Guddiga ....................65
5.19 Qodobka 62aad: Xil-waayidda Xubnaha Guddiga ....................65
5.20 Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 4aad ....................65
Jaantuska 4aad: Natiijada wax-kabeddelka Cutubka 4aad ....................66

## **Kalmadda Guddoomiyaha** Guddiga Dib-u-eegista iyo La socodka Hirgelinta Dastuurka

Waxaan halkaan uga mahadcelinayaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo nagu aaminay in aanu daadihinno geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka oo BFS u xilsaaranyahay si waafaqsan qodobka 63aad iyo 71aad iyo cutubka 15aad ee Dastuurka KMG ah, waxaan si gaar ah u mahadcelinayaa xubnaha Guddiga Dib-u-eegista iyo La socodka Hirgelinta Dastuurka, xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo hawlwadeennadooda oo u dhabar adeygay ka miradhalinta cutubyada 1aad ilaa 4aad ee aan halkaan kusoo gubnineyno. Sidoo kale, waxaan u mahacelinayaa Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee XFS.

Geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka Soomaaliya wuxuu soo maray marxalado kala duwan, wuxuuna marayaa xilli ay jirto fursad aad u sarreysa maaddaama ay tahay markii ugu horreesay ee la horkeeno Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Geedi-socodkaas dheer oo soconayey muddo xilleedka saddex dawladood oo kala duwan oo dhammaantood madaxdi hogggaaminayey usoo dhabar adeygeen marxalado adag oo lasoo gudboonaaday, dhamaantood waxay mudanyihiin in loo mahadnaqo, waxaanse si gaar ah u xusayaa uguna mahadcelinayaa wasiirkii hore ee Dastuurka XFS Mudane Cabdiraxmaan Xoosh Jibriil oo runti tiir-dhexaad u ahaa dhammaystirka Dastuurka KMG 2012 ee dalkeenu maanta ku dhaqmo, isla markaana dhidibada u aasay tubta geedi socodka dib u eegista dastuurka ee ku xusan cutubka 15aad ee ina gaarsiinaya himilooyinka dhismaha jamhuuriyad casri, xasilooni, barwaaqo ah, kuna dhisan dimuquraad dastuuri ah.

Cabdiraxmaan Xoosh Jibriil wuxuu geeriyooday mudo xileedkii labaad isagoo ku howlan isla himilooyinki uu dhibibada u aasay ee ahaa dhameystirka dastuurka JFS ee aanu maanta tubteeda hayno, wuxuu ahaa sharci yaqaan aragti dheer, waddani ah, naxariis badan oo deeqtoon, hawlkar ah, una soo adeeggay dalkiisa iyo dadkiisa xilli adag, waxaan Eebe uga baryayaa inuu ku mannadeysto naxariitiisa janno.

Waxaan sidaas si lamid ah xusayaa AUN Dr. Maxamed Daahir Afrax, oo isna xilli adag soo hoggaamiyey Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, waxaan ilaahay asna u waydiinayaa in uu ka waraabiyo jannooyinkiisa midda ugu sarreysa.

Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka
Dib-u-eegista Dastuurka BFS

## **Kalmadda Guddoomiyaha** Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

Waxaa Alle mahaddiis ah in Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka "GMDHD" uu soo gabagabeeyay diyaarinta warbixin aad u faahfaahsan oo muuqaalineysa wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah.

GMDHD intii uu ku guda jiray diyaarinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah, wuxuu diiradda saaray warbixinnadii iyo soojeedimihii Baarlamaannadii 9aad iyo 10aad, ayadoo ay jirtay in xilligaasi la sameeyey la-tashiyo badan oo lala yeeshay hay'adaha Dawladda Federaalka, Dawlad Goboleedyada iyo bulshada rayidka qaybaheeda kala duwan. GMDHD asagoo kaashanaya khubaro iyo xeeldheerayaal dhanka sharciga iyo arrimaha Dastuurka, wuxuu sameeyey cilmibaarisyo iyo isbarbardhig dastuurro kala duwan oo ay leeyihiin dalal ka badan siddeetan(80).

Warbixintan oo ah tii ugu horreysay oo la diyaariyo waxay sahleysaa in xildhibaanka ama muwaaddinka Soomaaliyeed ee akhrisanaya ay u sahasho nidaamka ama habka uu guddigu u soojeediyey iyo qodobbada lagu sameeyey toosin, siiqeyn, ku daris ama ka dhimid iyo qodobbo cusub oo lagu soo kordhiyey ama laga tiray asalkii Dastuurka. Sidoo kale, warbixintan waxay taxliil faahfaahsan ku sameynaysaa heshiisyadii Golaha Wadatashiga Qaran(GWQ) uu gaaray ee guddigu ka gutay waajibaadkiisa dastuuriga oo ah dastuuraynta heshiisyadaasi.

Waxaa lagama maarmaan ah in la xuso marka la qabanayo shaqo in laga dhaxlo caqabado iyo faa'idooyin labadaba, balse Guddiga intii uu ka shaqeynayey cutubyadan wuxuu u dhabar adeygay dhammeystirkooda ayadoo ay jirtay caqabado kala duwan.

Waxaan halkan ugu mahadcelinayaa dhammaan xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo hawlwadeennada guddiga oo diyaariyey cutubyada 1aad ilaa 4aad iyo warbixinta faahfaahineysa soojeedinta wax-kabeddelka, sidaas si lamid ah waxaan u mahadcelinayaa xubnaha Guddiga Dib-u-eegista iyo La socodka Hirgelinta Dastuurka oo dowr muhiim ah ka qaatay dhammaystirka cutubyadaan oo u gudbinaya Baarlamaanka Federaalka labadiisa Aqal, iyadoo xildhibaannadu ay haystaan fursad dahabi ah, maaddaama ay tahay markii ugu horreysay oo Baarlamaanka labadiisa aqal loo soo gudbiyo wax-kabeddelka cutubyada si looga doodo loona ansixiyo. Waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa Wasaraadda Caddaaladda iyo Arimaha Dastuurka XFS, sidoo kale waxaan halkan uga mahadcelinayaa Guddoomiyaha Akademiye Goboleedka Af Soomaaliga "AGA" **Mudane Cabdalla Mansuur** oo Guddiga ka caawiyey dhanka sixidda qoraalka iyo hay'adda Max Planck oo Guddiga ka caawisay dhanka farsamada intii ay socotay diyaarinta afartan cutub.

Avv. Burhaan Aadan Cumar
Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee
Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

## 1. Hordhac

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD) oo gudanaya waajibaadkiisa si waafaqsan qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka KMG ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa uu billaabay dib-u-eegidda cutubyada Dastuurka KMG ah, kaddib markuu ka guddoomay Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka Dastuurka ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya BJFS. Guddigu waxuu illaa hadda dib-u-eegid ku sameeyey cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah. Warbxintan waxay la socotaa soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada kor ku xusan ee uu diyaariyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS si loogu gudbiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Warbixintu waxay faahfaahinaysaa wax-kabedellada la soojeediyey iyo sababaha loo cuskaday wax-kabeddelkaas. Sidoo kale, waxaa la caddeynayaa haddii sidii asalka Dastuurka KMG ah uu ahaa loo qaatay ama la tirtiray iyo sababta loo cuskaday in go'aankaas la qaato. Qodobbada wax-kabeddelka lagu sameeyey iyo kuwa cusub ee lagu soo daray ee loo arko in ay u baahan yihiin sharraxaad dheeri ah, waxaa lagu darayaa faahfaahin iyo tusaalooyin dalal kale haddii loo baahdo. Waxaa kale oo la xusi doonaa haddii ay jiraan heshiisyo caalami ah oo ay Soomaaliya qayb ka tahay oo saamayn ku yeelan kara qodobbada Dastuurka iyo wax-kabeddelkooda.

### 1.1 Diyaarinta Cutubyada 1aad ilaa 4aad

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD), markuu Guddiga La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ee BJFS ka guddoomay cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka, wuxuu si degdeg ah u billaabay diyaarinta wax-kabeddelkooda, isagoo garowsan ahmiyadda weyn ee ay u leedahay dawladnimada Soomaaliya, isla markaasna tixraacaya qorshaha hay'adaha Dastuuriga ah oo ay ku heshiiyeen bishii Maajo 2023. Si loo sahlo diyaarinta wax-kabeddelka dhammaan cutubyada Dastuurka KMG ah, waxaa 15ka cutub ee Dastuurka KMG ah loo kala qaybiyey saddex qaybood oo kala ah: (a) Cutubyada 1aad ilaa 4aad; (b) Cutubyada 5aad ilaa 9aad; iyo (c) Cutubyada 10aad ilaa 15aad.

Go'aankaas waxaa loo qaatay saameynta weyn ee uu ku yeeshay heshiiskii doorashooyinka cutubyada kala duwan ee Dastuurka KMG ah, si loo billaabi karo diyaarinta cutubyada kale ee Dastuurka, kaddib ansixinta Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya cutubka 4aad ee saaameynta ku leh cutubyada ku xiga.

### 1.2 Habraaca Diyaarinta Wax-kabeddelka Loo Maray

GMDHD, asagoo raacaya jihaynta Guddiga La-socodka, wuxuu u maray diyaarinta cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah tabta iyo axkaamta ku xusan qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka, wuxuuna saldhig uga dhigay:

- Warbixinnadii iyo soojeedintii dib-u-eegista Dastuurka ee xilligii 1aad iyo xilligii 2aad ee (2016 iyo 2020);

- Cilmibaarisyo uu GMDHD sameeyey isagoo kaashanaya khuburo ku xeeldheer arrimaha dastuur samaynta ee heer caalami iyo heer qaranba, isagoo isbarbardhig ku sameeyey siyaabo kala duwan 80 dastuur, oo ay leeyihiin dalal badan oo ay ka mid yihiin kuwo ku dhaqma nidaamka federaalka kuna kala yaal qaaradaha adduunka.
- Heshiisyada siyaasadeed ee uu gaaray Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ),
- Qaraarkii Baarlamaankii 9aad ee 2015.

Si loo diyaariyo qoraal tayo leh, GMDHD wuxuu qaaday tallaabooyinka soo socda:

- Lafaguridda warbixinnadii iyo soojeedimihii horay looga diyaariyey dib-u-eegista Dastuurka ee 2016 iyo 2020.
- Lafagurid iyo falanqeyn ku saabsan heshiisyada Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ), gaar ahaan Heshiiskii Hannaanka Doorashooyinka iyo Heshiiskii Batroolka oo khuseeya cutubyadan uu GMDHD ka shaqeeyey. Guddigu wuxuu heshiisyadaas ku sameeyey falanqeyn farsamo iyo mid sharci.
- Dulmar guud: Guddigu wuxuu billaabay dulmar guud oo ay xubnuhu uga doodayaan qodobbada cutubka 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad. Dulmarkaas waxaa loo kala hormarinayey hadba sida ay cutubyadu iyo qodobbadu shaqo ugu baahan yihiin. Guddigu wuxuu dhagaystay talooyin iyo sixitaanno ay xubnaha soojeediyeen. Sidoo kale, haddii ay jirto arrin u baahan daraasad dheeri ah ama la soojeediyo in talo dheeraad ah la raadiyo taas oo ka maqan qabyoqoraalka, waxaa loo xilsaarayey khuburada iyo xubnaha Guddiga in daraasad dheeraad ah laga sameeyo.
- Ku-daridda qodobbada dheeraadka ah ee laga soo sameeyey cilmibaarista haddii xubnuhu ay isku raacaan.
- Ansixinta xubnaha Guddiga soojeedinta nuqulka kama-dambaysta ah ee cutub kasta marka la dhammeeyo.
- Soo-bandhigid: GMDHD wuxuu usoo bandhigay Guddiga La-Socodka ee BJFS soojeedinta cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka.
- Fallooyiinka iyo talooyinka: Guddiga La socodka wuxuu siiyey GMDHD faallooyinka iyo talooyin sii loogu daro soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad.
- Ku-daridda faallooyinka: GMDHD wuxuu kusoo daray talooyinkii Guddiga La socodka ee BFS.
- Ansixinta Soojeedinta: Guddiga La-socodka ee BJFS wuxuu ansixiyey soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad,2aad, 3aad iyo 4aad ee uu soo diyaariyey GMDHD.

### 1.3 Noocyada Wax-kabeddelka ee uu sameeyey GMDHD uuna Ansixiyey

Sida ku xardhan jaantustuka hoose, wax-kabeddelka uu guddigu ku sameeyey qodobbada cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad waxay ka kooban yihiin:

- Dib-u-eegis farsamo in lagu sameeyo sida toosin, siiqayn, hab-qaanuuni ah u qorid, sixidda luuqadda, qaladaadka qoraalka, IWM.
- Ku daris oo ah in wax cusub lagu soo kordhiyo oo noqon kara qodob, faqrad ama axkaam cusub oo ku dhex jiri karta.
- Tirtirid ama ka dhimid,
- Dastuuraynta heshiisyada siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaran





### 1.4 Heshiisyada Siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaran

Si waafaqsan axkaamta Dastuurka KMG ah gaar ahaan qodobbada 44aad, 54aad, 52aad, 122aad, jadwalka 1(C&D) ee Dastuurka iyo Qaraarka summadiisu tahay GSH/21/15 ee 27/07/2015, Dastuurku wuxuu tilmaamayaa in madaxda fulinta Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo madaxda fulinta dawlad goboleedyada ay yeelan karaan kulammo ay ku geli karaan heshiisyo iyo go'aanno lagu dhamaystirayo dib-u-eegista Dastuurka KMG ah, heshiisyadaas oo ay ka mid yihiin: (a) astaynta awoodaha ee heerarka kala duwan; (b) federaalaynta maaliyadda iyo dhamaystirka heshiiska wadaagga kheyraadka dabiiciga ah; (c) dhameystirka nidaamka federaalka dalka; (d) nidaamka doorashooyinka, federaalaynta garsoorka dalka, iyo kuwo kale. Heshiisyada siyaaseed ee GWQ ma ahan xeerar leh awood sharci, mana ahan heshiisyo caalami ah, oo u dhaxeeya wadammo iyo hay'ado caalami ah ee waa go'aanno iyo heshiisyo loo madlay in lagu dhammaystiro Dastuurka KMG ah.

Golaha Wadatashiga Qaranku wuxuu gaaray heshiisyada siysaasadeed soo socda:

1. Heshiiska Hannaanka Fedaraaleynta Garsoorka, Diseembar, 2022.
2. Heshiiska Astaynta Awoodaha Hay'adaha Dawladda, Diseembar, 2022.
3. Heshiiska Qaabdhismeedka Aminga Qaranka, Maarso, 2023.
4. Heshiiska Federaaleynta Maaliyadda Dalka, Maarso, 2023.
5. Heshiiska Hannaanka Doorashooyinka JFS, May, 2023
6. Heshiiskii Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Dalka (Shidaalka iyo Macdanta), Juun, 2018




Habraaca loogu darayo heshiisyada siyaasadeed dib-u-eegista Dastuurka waxaa loo raacayaa sida ku xusan qodobka 63aad iyo 71aad ee Dastuurka oo faraya Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare in ay u raacaan wax-kabeddelidda Dastuurka habraaca ku xusan cutubka 15aad ee Dastuurka KMG ah, gaar ahaan qodobbada 133aad, 134aad iyo 136aad ee Dastuurka KMG ah.

Golaha Wadatashiga Qaran marka uu gaaro go'aannada wada-xaajoodka siyaasadeed ee wax-kabeddelka qodobbada Dastuurka, GMDHD wuxuu u beddelayaa heshiisyada GWQ luqad dastuuri ah, kaddib marka uu ka guddoomo Guddiga La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ee BJFS iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka. GMDHD wuxuu go'aannadaas ku dhafayaa dib-u-eegista Dastuurka si waafaqsan qodobbada 133aad, 134aad iyo Jadwalka 1( C&D).Kadib waxaa loo gudbinayaa labada Aqal ee BJFS, si xildhibaannadu ay uga doodaan loona helo aragtidooda iyo faallooyinkooda ku aaddan soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka ka hor ansixintooda sida ku xusan qodobka 136aad ee Dastuurka KMG ah.

## 2. Faallada iyo Sharraxaadda Wax-kabeddelka Cutubka 1aad

### Cutubka 1aad: Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Qoraalkan soo socda wuxuu faahfaahin ka bixinayaa wax-kabeddelka ku yimid cutubka koowaad, iyadoo la sheegayo nooca wax-kabeddelka lagu sameeyey, asbaabaha keenay wax-kabeddelka iyo cilmibaarista la sameeyey oo arrintaas la xiriirta (haddii ay jirto) iyo sidoo kale, tusaalooyin laga soo qaatay dalal ka mid ah caalamka ee la xiriirta axkaamtaas.

Cutubkan koowaad oo aad ugu muhiim ah haybta dawladnimada Soomaaliya, oo nidaaminaya arrimaha ay ka mid yihiin diinta dalka, sifooyinka muhiimka, mabaadii'da aasaasiga ah, calanka, sarreynta Dastuurka, afka rasmiga ah, xuduudaha, jinsiyadda muwaaddinka iyo caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa inta badan qodobbadaasi lagu sameeyey toosin. Waxaa lagu soo kordhiyey arrimo ay ka mid yihiin:

- Reebidda cayda diinta Islaamka iyo wax kasta oo wax u dhimaya diinta;
- U hoggaansanaan ku dhaqanka iyo talinta Dastuurka;
- Ilaalinta afka Soomaaliga iyo dhaqanka suubban ee ummadda;
- billad sharafta iyo maamuuska ay mudan yihiin calanka iyo heesta qaranka;

GMDHD wuxuu diyaariyey saddex xulasho oo ku saabsan caasimadaha dalka oo la rabo in mid laga doorto. Si loo helo fahan dheeraad ah oo ku saabsan maqaamka caasimadda, ayaa laga diyaariyey daraasad dheer oo lagu soo bandhigay tusaalooyinka qaar mid ah caasimadaha dalalka federaalka ah.

### 2.1 Qodobka 1aad: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Qodobkan wuxuu ka kooban yahay shan (5) faqradood, halka asalka Dastuurka u ahaa saddex (3) faqradood. Cinwaanka qodobka 1aad waxaa lagu kordhiyey ereyga "Federaalka", oo cinwaanka dhammaystiran ka dhigaysa "Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya". Waxaana loo arkay muhiim in lagu daro ereyagaas, sababtoo ah magaca wuxuu la socdaa nidaamka dawliga ah ee dalka ka hanaqaaday.

Faqradda 1aad ee asalka Dastuurka, Qodobka 1aad faqraddiisa (1) ee asalka waxay si isku dhafan uga hadleysay qiyamka iyo arrimo kale oo ay ku dhisan tahay JFS. Haddase, waxaa loo kala dhigay laba dhigood : faqradda (1) oo lagu qeexay haybta Jamhuuriyadda iyo qiyamka, waxaana lagu kordhiyey ereyga "Muslim ah" iyo "sarraynta sharciga".

Faqradda (2) oo cusub laguna sameeyey siiqeyn waxaa lagu xeeriyey arrimo muhiim ah oo ay JFS ku dhisan tahay, waxaana lagu kordhiyey "ee soo dhoweyneya kala duwanaanta afkaarta si waafaqsan shareecada islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya".

Faqradda 2aad ee asalka Dastuurka, oo noqotay faqradda 3aad ee soojeedinta waxaa lagu sameeyey toosin iyo siiqayn ayadoo loo qoray si qaanuuni ah. Faqradda 4aad ee soojeedinta labaad waa mid laga soo raray qaybta labaad ee faqradda 2aad ee qodobka asalka Dastuurka, waxaana laga dhigay faqrad cusub oo noqoneysa faqradda 4aad ee qodobkan, sababta looga jaray waa in loo baahan yahay kala qaadista labada axkaam ee ku qoran faqradda labaad ee asalka Dastuurka. Labada axkaam ee kor ku xusan, tan koowaad waxay tilmaamaysaa in shacabku leeyahay awoodda gobannimada, awooddaasna uu u isticmaali karo si toos ah ama si dadban. Tan labaadna waxay mamnuucaysaa in qof ama qayb shacabka ka mid ah sheegtaan ama adeegsadaan xaqa lahaanshaha gobannimada.

Faqradda 5aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo ahayd faqradda 3aad ee asalka Dastuurka, nuxurka waxba lagama beddelin, waxaa lagu soo kordhiyey ereyada "madaxbannaanida, qaranka iyo xudduudaha", oo ah mabaadi' aad u muhiim ah.

**2.2 Qodobka 2aad: Diinta Dalka**

Qodobkan wuxuu ka koobanyahay afar (4) faqradood, halka asalka Dastuurka uu ahaa saddex (3) faqradood. Cinwaanka Qodobka 2aad waxaa loo beddelay "Diinta Dalka" halka asalka Dastuurka uu ahaa "Dawladda iyo Diinta".

Faqradda 1aad ee qodobka 2aad ee asalka Dastuurka waxaa laga beddelay siiqada ay u qorneed, waxaa kale oo la beddelay ereyga "dawladda" oo lagu beddelay "dalka", maaddaama diintu ayna ahayn diinta dawladda oo keli ah, laakiin ay diin u tahay dalka oo dhan. Dastuurkii Jamhuuraiyadda Soomaaliya ee 1960[1] wuxuu xeerinayey in Islaamku yahay diinta dalka, ee uma dhigeyn in ay tahay tan dawladda oo keli ah. Waddamo badan oo muslim ah ama muslimiintu u badan tahay ayaa Dastuurka ku caddeeyay in Islaamku yahay diinta dalka. Tusaale, dalka Malaysia[2] oo ay ku nool yihiin dad kala diin duwan, wuxuu dastuurkoodu xeerinayaa in Islamku yahay diinta dalka federaalka ah, laakiin diimaha kale la adeegsan karo si nabdoon qayb kasta oo dalka ka mid ah. Halka dalal badan si kale uu u qeexayo sida dalka Masar[3], Dastuurka wuxuu xeerinayaa in Islamku yahay diinta dawladda, sidoo kale, Dastuurka dalka Pakistan[4] ayaa xeerinaya in Islamku yahay diinta dalka.

Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka oo xeerinaysa in aan diin aan Islam ahayn lagu faafin karin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, siiqada wax yar ayaa laga beddeley. Waxaa kale oo ereyga "dalka" lagu beddelay "Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya", iyada oo ujeeddadu tahay in si cad loogu muujiyo magaca dalka.

[1] Qodobka 1(3) ee Dastuurkii Soomaaliya 1960.
[2] Qodobka 3aad ee Dastuurka Malaysia,1957 (2007).
[3] Qodobka 2 ee Dastuurka Masar, 2019.
[4] Qodobka 2aad ee Dastuurka Pakistan.1973 (2018).

Qodobkaan waxaa lagu soo kordhiyey faqrad cusub oo noqotay faqradda 3aad oo si cad u reebaysa cayda diinta Islaamka iyo wax kasta oo wax u dhimaya diinta Islaamka. Reebiddaan waxba uma dhimeyso xuriyadda qowlka ee waxay mamnuucaysaa in diinta Islaamka lagu xadgudbo iyo wax kasta oo wax u dhimaya xushmada arrimaha diinta Islaamka.

GMDHD wuxuu diyaariyey cilmibaaris qoto-dheer si loo tixgeliyo suurtagalnimada in lagu daro axkaam cusub oo xeerinaysa tallaabooyinka ka dhanka ah Islaam nacayb ka. Cilmibaaristaas waxay falanqeysay isbarbardhigga dastuurrada iyo qaabdhismeedka caalamiga ah ee xeerarka xaaladahan oo kale, islamarkaasna waxay ku samaysay qiimeyn isbarbardhigga ah toban waddan oo ay ka mid yihiin shan dal oo muslim ah, waxayna si taxaddar leh u daraasaysay dastuurradooda iyo xeerarka kale ee ku saabsan mamnuucidda dhaqanka iyo ficillada ka soo horjeeda diinta.

Mamnuucidda dhaqammada iyo ficillada ka soo horjeeda diinta waxay leedahay dhaqan sharci oo soo jireen ah inta badan nidaamyada dawladeed. Falka muujinta quursiga, aflagaadeynta diinta iyo culimada, sidoo kale sumcad-dilidda diinta iyo dadka ku dhaqma, sumcad-xumida diinta iyo dadka raacsan, iyo dareennada diineed ee gef ku ah, ayaa xeerku mamnuucayaa inta badan.

Dalalka qaar waxay ku xeeriyaan arrintaan dastuurrada, halka qaar kale lagu nidaamiyo xeerar kala duwan oo mamnuucaya arrintaas. Dalka Soomaaliya, waxaa lagu xeeriyey arrintaan Xeerka Ciqaabta[5]. Haddaba, ayadoo la tixgelinayo duruufaha adag ee caalamka ku soo kordhay, GMDHD wuxuu u arkay muhiim in lagu daro Dastuurka si guud, iyadoo lagu faahfaahinayo arrintaan xeerarka kale ee dalka.

Faqradda 4aad oo ahayd faqradda 3aad ee asalka Dastuurka, ereyga "sharci" waxaa lagu beddelay "xeer", waxaana la tirtiray ereyga ah "mabaadi'da guud" maaddaama mabaadi'da shareecadu ay faqraddan tahay oo aysan ahayn mid kooban oo cayiman ayna keeni karto baahsanaan tafsiireed oo ku saabsan mabaadi'da, balse waxaa faqraddan si cad loogu xeeriyey in aan la soo saari karin xeer aan waafaqsanayn shareecada Islaamka. Waxaa jira ereyo badan isku si loo isticmaalay Dastuurka KMG ah dhexdiisa sida sharci, qaanuun iyo xeer. GMDHD wuxuu go'aamiyey farsamo ahaan in la adeegsado ereyga "xeer" guud ahaan soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka si loo helo iswaafaqsanaanta Dastuurka oo dhan.

## 2.3 Qodobka 3aad: Mabaadi'da Aasaasiga ah

Qodobkan 3aad wuxuu ka koobanyahay toddoba (7) faqraddood, halka asalka dastuurku uu ka koobnaa shan (5) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan, waxaa la tiray ereyga "caddaaladda bulshada" maaddaama uu macne ahaan ballaaran yahay uuna

[5] Qodobada 313-315 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliya.

yeelan karo macneyaal kala duwan laguna xusay meelo kale oo Dastuurka, waxaana kale oo lagu daray ereyga "Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka" oo asalkii ahayd "Dastuurka Soomaaliya", maaddaama ay lagama maarmaan tahay in Dastuurka oo dhan ereyada la isticmaalayo la is waafajiyo. Tan kale, sida aan kor ku xusnay, dalku wuxuu qaatay nidaam dawladeed oo federaali ah, waana muhiim in Dastuurka sidaas ay ka muuqato oo lagu xuso.

Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka ereyga "Islaam" waxaa lagu beddelay "Muslim", sababta loo beddeley ereyga Islaam waa diinta Nebi Muxammad (NNKH) loo soo dhiibay laguna soodejiyey, halka qofka diinta Islaamka rumaysan uu yahay "muslim".

Faqradda 3aad ee qodobkan waxay tilmaamaysaa in JFS ay ku dhisan tahay mabda'a awood qaybsiga, nuxurka waxba lagama beddelin, laakiin siiqada ayaa la toosiyey.

Faqraddan 4aad ee qodobkan nuxurka waxba lagama beddelin, laakiin waxaa lagu qorey siiqa qaanuuni ah ayadoo lagu darey ereyeda, "Ilaalinayaa, xurmeynayaa, xoojinayaa iyo daahfurnaan", sidoo kale, waxaa la tiray "dhiirigelinayaa iyo shuruudaha guud", waxaana kale oo lagu daray ereyga Dastuurka "Jamhuuriyadda Federaalka".

Faqradda 5aad waxba lagama beddelin nuxurkeeda, balse waxaa lagu sameeyey siiqo toosin, waxaa lagu daray ereyada "heer federaal, heer dawlad goboleed iyo dawladaha hoose".

Faqradda 6aad ee qodobkan waa faqrad cusub, waxaana loo soo kordhiyey in la caddeeyo in hay'ad kasta oo dawladeed ay awooddeedu ku xaddidan tahay inta Dastuurka iyo xeerarka dalku siiyeen. Faqradda 7aad waxaa laga soo raray nuxurkeeda cutubka 3aad qodobka 43aad, faqradiisa 1aad ee asalka Dastuurka, waxaana lagu daray "badda, hawada iyo khayraadka dabiiciga", ayadoo loo arkay in ay tahay mabda' aasaasi ah kuna habboon tahay in lagu daro qodobka 3aad oo ka hadlaya mabaadi'da aasaasiga ah ee Dastuurka. GMDHD wuxuu arkay muhiim in ay tahay ku daridda badda iyo hawada sababtoo ah waxay ka mid yihiin geyiga Soomaaliyeed oo qaybta ka ah gobannimada iyo madaxbannaanida Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### 2.4 Qodobka 4aad: Sarreynta Dastuurka

Qodobkan 4aad wuxuu ka koobanyahay saddex (3) faqradood, halka asalka dastuurku uu ahaa laba (2) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan waxay xeerinaysaa in dastuurku yahay, Shareecada ka sokow, xeerka ugu sarreeya JFS, waxaa loo qoray hab qaanuuneed iyadoo aan nuxurka faqradda waxba laga beddelin.Sidoo kale, waxaa lagu daray faqraddan "heer kasta oo dawladeed ee Jamhuuriyadda Federaalka", waxaana loo arkay in ay muhiim tahay in lagu daro qaybta jumladdan sababtoo ah masuuliyaddu waxay ku dhacaysaa heerarka kala duwan ee dawladda si waafaqsan astaynta awoodaha.

Faqradda 2aad waa mid cusub, waxayna xeerinaysaa in dhammaan dadka, hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka ahba ay khasab ku tahay in ay u hoggaansamaan ku-dhaqanka iyo talinta Dastuurka. Faqradda 3aad ee qodobkan waa faqradda 2aad ee asalka Dastuurka waxaa lagu sameeyey toosin, iyadoo si cad loo sheegay in uu yahay waxba kama jiraan xeer kasta, go'aan kasta ama tallaabo maamuleed kasta oo ka soo baxa heer kasta dawladeed oo ka soo horjeeda Dastuurka.

### 2.5 Qodobka 5aad: Afka Rasmiga ah

Cinwaanka Qodobka 5aad oo asalka Dastuurka oo ahaa "afafka rasmiga ah" waxaa laga dhigay "afka rasmiga ah", sababtoo ah jamaca kalmadda waxaa laga yaabaa in ay muujiso in dalku leeyahay afaf badan oo rasmi ah. Qodobkan waa laba (2) faqradood halka asalka Dastuurka uu ahaa hal (1) faqrad.

Faqradda 1aad waxba lagama beddelin nuxurkeedii, waxayna tilmaamaysaa afka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya in uu yahay Afka Soomaaliga, halka Af-Carabiga yahay luuqadda labaad ee dalka.

Waddamada qaar waxay kala saaraan luuqadda qaranka (national language) iyo luuqadda rasmiga ah (official language). Dastuurka dalka Rwanda[6], qodobka 8aad oo cinwaankiisu yahay luuqadda qaranka ah iyo luuqadaha rasmiga ah, wuxuu xusayaa luuqadda rasmiga ah iyo saddex luuqadood oo kale oo rasmi ah, qodobkaas, waxaa kale oo uu xeerinayaa in dukumiintiyada dawladda in ay ku qornaan karaa hal ama laba luuqadood ama dhammaan luuqadaha rasmiga ah, isla qodobkan wuxuu tilmaamayaa in xeer uu soo saaro dalkaasi kordhin karo luuqadaha dalka. Sidaas oo kale, qodobka 7aad ee Dastuurka Kenya[7] wuxuu kala saarayaa luuqadda qaranka iyo luuqadaha rasmiga ah, isagoo xeerinaya in Sawaaxiligu yahay luuqadda qaranka halka Ingiriiska iyo Sawaaxiliga yihiin luuqadaha rasmiga ah.

Faqradda 2aad ee qodobkan waa mid cusub, sababta loo soo kordhiyey faqraddan waa in Dawladda Federaalka ay la timaaddo siyaasad ay ku hormarinayso kuna daryeelayso, laguna ilaalinayo Afka Soomaaliga iyo dhaqanka suubban ee ummadda si loo ilaaliyo jiritaanka Afka Soomaaliga iyo dhaqankaba.

Qodobka 6(5) (b) ee Dastuurka dalka Koofur Afrika[8] wuxuu xeerinayaa in afafka rasmiga ah ee dalka in la hormariyo lana hubiyo xurmadooda.

### 2.6 Qodobka 6aad: Calanka iyo Astaanta Qaranka

Qodobkan wuxuu ka kooban yahay shan(5) faqraddood, halka asalka Dastuurku uu ahaa afar (4) faqradood. Nuxurka faqradda 1aad ee qodobkan iyana waxba lagama beddelin, sidii asalka Dastuurka ayaa loo qaatay. Ereyga bey-cad ama beeycad waa midabka loo yaqaan buluugga oo midab furan, iftiimaya, cadaan xige= (azurro/light blue/azraq).

[6] Qodobka 8aad, Dastuurka Rwanda 2003 oo wax-kabeddel lagu sameeyey 2015.
[7] Qodobka 7aad, Dastuurka Kenya 2010.
[8] Qodobka 6aad, faqradda 5aad, xarafka b ee Dastuurka Koofur Afrika.

Faqradda 2aad oo ku saabsan astaanta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxba lagama beddelin oo sideeda ayaa loo qaatay. Dhammaan dastuurradii iyo Axdi Qarameedyadii dalku yeeshay isku si ayey u qorneyd.[9]

Nuxurka faqradda 3aad ee xeerinaysa heesta astaanta qaranka "Qolobaa Calankeed" waxba lagama beddelin aan ka ahayn in lagu kordhiyay inay tahay astaanta Dawladda Federaalka, isla markaasna ay dawlad goboleedyada u adeegsadaan munaasabadaha rasmiga ah si loo adkeeyo midnimada qaranka.

Faqradda 4aad ee wax-kabeddelka Dastuurka waa cusubtahay, waxayna xeerinaysaa in Baarlamaanka Federaalka xeer gaar ah ka soo saari doono billad sharafta iyo maamuuska ay mudan yihiin calanka iyo heesta qaranka.

Billad waa hab maamuus abaal marineed ee qof muteystay lagu siiyo shaqo uu qabtay darteed, waxayna leedahay qayba badan oo kala duwan, sida habmaamuuska billadaha nabadda, ciidammada, sharafeedka iwm.

Astaanta qaran waa astaan u taagan hay'ad kasta siineysana tixgelin una muujinaysa caalamka inay tahay bulsho qaran, dawlad madaxbannaan. Sidoo kale ummadaha iyo waddammada ku jira xaalad gumaysi ama kuwo kale oo ku tiirsan hannaanka is-dhexgalka federaalka, ama xitaa bulsho-dhaqameed loo tixgeliyo 'Qarannimo' inkastoo aysan jirin madaxbannaani siyaasadeed.

Ujeedka astaamaha qaranku waa inay bulshada mideeyaan iyagoo abuuraya muuqaal, af, ama muuqaal ka tarjumaya dadka qaranka ah, qiyamka, yoolalka, ama taariikhda. Astaamahan ayaa inta badan lagu soo bandhigaa qayb ka mid ah dabaaldegyada waddaniyadda ama himilooyinka qarannimo (sida madaxbannaanida ama dhaqdhaqaaqa gooni u istaagga) waxaana loo qaabeeyaa astaamaha qaran inay noqdaan kuwo loo dhan yahay oo metelaya dhammaan shacabka qaranka.

Faqradda 5aad ee qodobkan ee wax-kabeddelka Dastuurka oo ahayd faqradda 4aad asalka Dastuurka waxay xeerinaysaa in Dawlad Goboleedyada yeelan karaan calan iyo astaan u gaar ah, laakiin ayna yeelan karin hees astaameed u gooni ah oo ay tan qaranka u isticmaalayaan munaasabadaha. Sida kor lagu xusay, ujeeddada waxay tahay in midnimada qaranka iyo wax wada lahaanshaha la xoojiyo

### 2.7 Qodobka 7aad: Geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Qodobkan wuxuu ka koobanyahay afar (4) faqradood, halka uu asalka Dastuurka ka ahaa shan (5) faqradood. Faqradda 1aad waxaa la beddelay ereyga "dhulka" oo lagu beddelay "geyiga" si waafaqsan cinwaanka qodobka, maaddaama ereyga "geyiga" uu ka

[9] Fiiri, Qodobka 1(2) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya 1960; Qodobka 2(2) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya 1979; Qodobka 6(2) iyo (3) ee Axdiga KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya 2004;

macno ballaaran yahay ereyga "dhulka" uuna koobayo dhammaan dhulka, badda iyo hawada ka sarreysa, sidaas si la mid waxaa ereyga "sharci" lagu beddeley "xeer". Waxaa kale oo la soo kordhiyey ereyga "webiyada" oo ah qayb muhiim ah oo kamid ah geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, maaddaama dalku leeyahay webiyo waaweyn.

Faqradda 2aad ee qodobkan oo ku saabsan in aan geyiga Jamhuuriyadda Federaalka la kala qaybin karin nuxurka waxba lagama beddelin, laakiin waxaa la isticmaalay ereyga "lama kala goyn karo" oo ah erey si mug leh u tilmaamaya ujeeddada faqradda laga leeyahay.

GMDHD wuxuu soojeediyey in la tiro faqradda 3aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka gebi ahaanba maaddaama ay shaki gelineyso xuduudaha geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayna u horseedeyso inay khilaafyo ka abuurmi karaan xudduudaheeda. Sida uu qabo Axdiga Qaramada Midoobay[10], khilaafka xuduudaha iyo khilaafka dalalka ka dhexeeya waa in lagu xalliyo qaab nabad ah. Sidaas daraadeed, looma baahna in Dastuurka Soomaaliya lagu xuso khilaaf xuduudeed oo imaan kara iyo sida loo xallinayo, haddii uu yimaadana waxaa loo xallin karaa si waafaqsan qawaaniinta caalamiga ah. Tusaale wanaagsan waxaa ah, murankii xudduudda badda ee u dhexeeyey Soomaaliya iyo Kenya waxaa lagu xalliyey Maxkamadda Caddaaladda Caalamka (ICJ)[11].

Faqradda 3aad ee qodobkan ee soojeedinta wax-kabeddelka oo horey u ahayd faqraddii 4aad ee asalka Dastuurka waxba lagama beddelin oo sideeda ayaa loo qaatay.

GMDHD wuxuu sameeyey daraasad ku saabsan xuduudaha: Dastuurradii iyo axdiyadii dalku yeeshay ay arrinka xudduudaha u kala wajaheen laba qaab. Dastuurradii ka horreeyey burburkii dowladdii dhexe 1991kii, xudduudaha laguma cayimi jirin. Tusaale, Qodobka 4aad ee Dasuurkii 1960, Qodobka 5aad ee Dastuurkii 1979kii, Qodobka 6aad ee Dastuurkii 1990, dhammaan kama hadlin xudduudo ee waxay qoreen in dhulka Soomaaliyeed yahay laguma xadgudbaan. Axdi-Qarameedyadii iyo dastuurradii la sameeyey wixii ka dambeeyey 2000, waxaa billaabatay in la xuso xudduudaha dalka oo la yiraahdo dhankaas waxaa ka xiga dal behel. Qodobka 3aad ee Axdiga Qaranka ee KMG, faqradda 3aad ayaa lagu cayimay xuduudaha markii ugu horreysay oo la magacaabay dalalka dhinacyada ka xiga Jamhuuriyadda Soomaaliya. Qodobka 2aad, faqradda 3aad ee Axdiga KMG ee JFS 2004, Qodbka 7aad Faqradda 5aad ee Dastuurka KMG 2012, waxay xusayaan xudduudaha.

Waddamada inta badan dastuurka kuma xusaan xudduudaha iyo dalalka ama badweynnada dhinacyada ka xiga. Xudduudahooduna waxa ay dastuurrada ugu qoran yihiin qaabkii ay ugu qornaan jireen dastuurrada Soomaaliya burburkii dowladdii dhexe ka

[10] United Nations Charter, Chapter VI, Article 33-38, oo laga heli karo: https://www.un.org/en/about-us/un-charter/full-text .
[11] Maritime Delimitation in the Indian Ocean (Somalia vs Kenya), oo laga heli karo : https://www.icj-cij.org/case/161.

hor. Qodobka 5aad ee Dastuurka Rwanda waxa uu xeerinayaa geyiga dalka iyo qaybaha uu ka kooban yahay sida dhulka, wabiyada, hawada sare, iyo harooyinka ku yaalla geyida dalka. Sidoo kale, Qodobka 5aad ee Dastuurka Kenya waxa uu sheegayaa in geyiga Jamhuuriyadda kenya ka kooban yahay dhulka iyo biyaha, mana cayimayo xudduudaha iyo waddamada ay xuduudaha kala dhaxayso. Qodobka 2aad ee Dastuurka Ethiopia ma cayimayo xuddoodo, waxa uuna leeyahay xudduudaha waxaa go'aaminaya heshiisyo caalami ah.

## 2.8 Qodobka 8aad: Shacabka iyo Jinsiyadda

Qodobkan wuxuu ka koobanyahay saddex (3) faqradood, halka asalka Dastuurka uu ahaa afar (4) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu kordhiyey ereyga "federaalka" oo keli ah.

Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waxaa lagu sameeyey siiqeyn, waxayna xeeerinayaa in jinsiyadda Soomaaliya tahay mid qudhah, tilmaamaysana in xeer gaar ah la soo saari doono kaas oo nidaamin doona sida lagu helayo ama lagu luminayo jinsiyadda Soomaaliya. Waxaana lagu daray ereyga "Jamhuuriyadda Federaalka" waxaana ereyga "Sharci" lagu beddely "xeer". Sidoo kale ereyga "Golaha Shacabka ee Dawlada" waxaa lagu beddelay "Baarlamaanka".

Faqradda 3aad waxba lagama beddelin nuxurkeedii ee waa la siiqeeyey lana toosiyey, waxayna xeerinaysaa oo oggolaanaysaa in muwaaddiniinta Soomaaliyeed qaadan karaan jinsiyad dal shisheeye iyaga oo aan ka tanaasulin ama lumin jinsiyaddooda.

Faqradda 4aad ee qodobkan ee asalka dastuurka waa la tirtiray, waxaana lagu daray nuxurkeedii faqradda 2aad ee qodobkan ee Asalka Dastuurka. Faqraddan waxay tilmaamaysaa in xeer la soo saarayo kaas oo xeerinaya habka lagu laalayo ama hakinayo jinsiyadda Soomaaliya.

**Cilmibaarista La xiriirta Jinsiyadda**

GMDHD wuxuuu diyaariyey cilmibaaris oo lagu daraaseenayo habka dalalka caalamku ugu nidaaminayaa jinsiyada muwaaddinka, ayaddoo tixgalin gaar ah la siiyey dalalka aan dariska nahay iyo kuwo isku duruufta nahay.

Haddii lasoo kobo, waxaa jirta habab lagu helo jinsiyada guud ahaan siiba waxaa jira mabda' "Jus soli" iyo "Jus Sanguinis", qoraalkaan soo socda wuxuu faafaahin ka bixinaya hababka lagu helo jinsiyadda iyadoo isbarbardhig lagu sameenayo dalalka kala duwan ee caalamka.

Jinsiyadda lagu qaato ku dhalashada dal kale "Jus Soli": Tusaale, wax-kabeddelkii afar iyo tobanaad ee Dastuurka Mareykanka wuxuu isla markii siinayaa jinsiyad toos ah qofkii ku dhashay dalka, iyadoo aan loo eegaynin in labada waalid ama midkood uu leeyahay jinsiyadda Mareykanka, qof kastoo ku dhasha Mareykanka wuxuu xaq u leeyahay jinsiyadda Mareykanka[12]. Waxaa la mid ah dalalka Brazil[13], Peru iyo dalal kale.

Jinsiyadda lagu qaato dhiig ahaan "Jus Sanguinis": Jinsiyada lagu helo sababo la xiriirta jinsiyadda uu haysto aabaha ama hooyada awgeed (iyadoo loo eegaynin meesha uu ku dhashay), tani waxaa loo yaqaannaa "Jinsiyadda Dhiigga ama isirka". Tusaale, dalka Ethiopia[14], Kenya[15], Masar[16] iyo dalal kale waxay ku bixinayaa jinsiyadda waalidka jinsiyadiisa ama midda dhiigga (jus sanguinis).

Jinsiyadda lagu helo siismo "naturalisation": Jinsiyadda lagu qaato iyadoo la marayo habraac maamul marka la reebo midda dhalashada sida midda lagu helo "naturalisation", diwaangelin ama guur waxaa lagu magacaabaa "jinsiyadda lagu qaato siismo" sida guur, diiwaangelin, qaxootinimo.

Tusaalooyina Dastuurada dalalka caalamka gaar ahaan Afrika:
Dalal badan ayaa dastuurradooda ugu caddeeya qaababka jinsiyadda lagu heli karo. Tusaalooyin badan ayaa halkaan lagu soo qaadanayaa oo ay ka mid yihiin dhowr dal oo qaaradda Afrika ah.

Dastuurka Kenya[17], Qodobka 13aad, faqradda 2aad wuxuu xeerinaysaa qaababka lagu heli karo jinsiyadda dalkaas oo kala ah u dhalasho & diiwaangelin (siismo). Dastuurka Uganda wuxuu xeerinayaa in lagu hesho saddex hab oo kala ah: u-dhalasho (qof kasta oo waalidkiis ama awoowoyaashii ay yihin ugandan); ku-dhalasho (Diiwaangalin); iyo siismo[18]. Sidaas oo kale, Dastuurka dawladda Itoobiya asaguna wuxuu xeerinayaa habka lagu helo jinsiyada.[19]. Sidoo kale, dastuurada Ghana[20], Dastuurka Nigeria[21] iyo dalalka kale ee Afrika ka tirsan wuxuu xeerinayaa qaababka lagu heli karo jinsiyadda. Dastuurka Ciraaq wuxuu xeerinayaa habka lagu helo jinsiyadda[22].Sidaas si lamid ah ayuu Dastuuka Turkey u xeerinaya[23]. Sidoo kale, Dastuurka India wuxuu nidaaminayaa in lagu heli kara saddex hab ah u dhashay, ku dhashay iyo siismo.[24].

[12] Waxaa ka baxsan oo keli ah carruurta u dhalata diblomaasiyiinta shisheeye oo aan carruurtoodu qaabkaas jinsiyadda Maraykanka ku helaynin.
[13] Qodobka 12 ee Dastuurka Brazil, 1988( dib-u-eegis lagu sameeyey 2015).
14 Qodobka 6aad , faqradda 1aad ee Dastuurka Ethiopia.
15Qodbka 14aad, faqradda 1aad ee Dastuurka Kenya 2010.
[16] Qodbka 6aad, ee Dastuurka Masar.
[17] Qodobka 13(2) ee Dastuurka Kenya, 2010. Qodobbada 14aad, 15aad ee Dastuurka Kenya ayaa faahfaahinaya qaababka jinsiyadda lagu heli karo.
[18] Qod 10-13 ee Dastuurka Uganda,
[19] Qodobka 6aad ee Dastuurka Itoobiya (1994)
[20] Cutubka 3aad ee Dasruurka of Ghana.
[21] Cutubka 3aad ee Dasruurka Nigeria.
[22] Qodobka 18aad ee Dastuurka Ciraaq
[23] Qodobka 66aad ee Dastuurka Turkey, 1982(Dib-u-eegist:2017)
[24] Qodobka 5aad ee Dastuurka India.

GMDHD wuxuu sameeyey daraasad gaar ah oo la xiriirta sharcigii 1962 ee nidaaminayey Jinsiyadda.

Si guud Qodobka 1aad ee sharcigii 1962kii wuxuu sheegayaa in "Jinsiyadda lagu qaadan karo 3 xaaladood.[25] Intaas waxaa dheer, Axdigii Federaaliga KMG ah wuxuu xeeriyey in qof kasta oo asalkiisu Soomaali yahay uu xaq u leeyahay jinsiyadda Jamhuriyadda Soomaaliya oo ay shardi tahay:
a) Inuu/inay ku dhashay/dhalatay Jamhuuriyadda Soomaaliya, ama
b) Aabihiis/aabaheed uu haysto Jinsiyadda Jamhuuriyadda Soomaaliya…[26].Sidoo kale, Qabyoqoraalka Dastuurka Latashiga Dadweynaha ee 2010 wuxuu soojeediyey in dhalashada lagu heli karo isir ama siismo[27].

Daastuurrada dalal badan sidan oo kale ayey ku caddahay in ilmaha ay dhasho hooyada ama uu dhalo aabbe haysta dhalashada dalka uu qaadanayo jinsiyadda dalkaas.

Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta (1989)[28], wuxuu farayaa in ilmaha isla marka uu dhasho la diiwaangelinayo, wuxuuna xaq u leeyahay magac, xaqa helidda jinsiyadda…". Soomaaliya waxay qayb ka tahay heshiiskan.

Tusaale, dastuurka dalka Kenya[29], Qodobka 14aad, faqradda 1aad ayaa xeerinaysa in ilmaha maalinta uu dhasho aabbihiis ama hooyadiis ay haysato jinsiyadda Kenya uu qaadanayo jinsiyadda dalka. Dastuurka dalka Ghana[30], Qodobka 6aad, faqradda 2aad wuxuu xeerinayaa in ilmaha aabbahood, hooyadood, awoowayaashood ama ayeeyooyinkood haystaan jinsiyadda dalka ay helayaan jinsiyadda dalka. Sidoo kale, Dastuurka Ethiopia[31], Qodobka 6aad, faqradda 1aad, waxay xeerinaysaa in qof kasta oo labadiisa waalid ama mid ka mid ah haysto jinsiyadda Ethiopia oo helayo jinsiyadda dalka.

Waxaa jira wadammada qaar oo ragga iyo dumarka aysan u sinnayn xaqa helidda jinsiyadda ubadkooda ama midda lagu helo guurka. Wadammadani waxay leeyihiin shuruuc ama siyaasado mamnuucaya ama xaddidaya xaqa haweenka ay ilmoohooda ugu gudbin karaan muwaaddinnimadooda ama ninkeeda oo muwaaddin ahayn. Tusaale: waxaa ka mid ah dalka Swaziland[32].

### 2.9 Qodobka 9aad: Magaalamadaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Qodobkan wuxuu ka kooban yahay laba (2) faqradood halka uu asalka Dastuurka ka ahaa hal (1) faqrad. Faqradda 1aad waxay qeexaysaa in caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay tahay magaalada Muqdisho.

---

[25] Qodobka 3aad ee Sharciga Jinsiyadda 1962
[26] Qodobka 10aad ee Axdigii KMG ah 2004.
27 Qodobka 10(1) iyo Qodobka 11(2) ee Qabyoqoraalka Dastuurka Latashiga Dadweynaha ee 2010
28 Qodobka 7aad, Heshiiska Caalamiga ee Xuquuqda Carruurta (1989).
29 Qoodbka 14aad, faqradda 1aad ee Dastuurka Kenya 2010.
30 Qoodbka 6aad, faqradda 2aad ee Dastuurka Ghana.
31 Qoodbka 6aad faqradda 1aad ee Dastuurka Ethiopia.
[32] Qoodbka 43aad, ee Dastuurka Swaziland, 2005

Faqradda 2aad oo la soo kordhiyey waxaa lagu nidaamiyey laba arrimood oo muhiim ah oo kala ah: (a) Maqaamka Magaalada Madaxda Soomaaliya; iyo (b) Matalaadda Caasimadda.

Labadaan arrimood waxaa lagu nidaaminayaa cutubka 5aad oo xeerinaya baahsanaanta awoodaha xukuumadda, qaabdhismeedka dawaladda oo ah saddex heer, qaabka ay ku dhismayaan dawlad goboleedyada.

Golaha Wadatashiga Qaran wuxuu ku darsaday hawlihiisa[33] shaqo in uu ka go'aan gaarayo maqaamka caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana heshiiskii Doorashooyinka ee GWQ[34] wuxuu tilmaamay in metaaladda xubnaha Aqalka Sare ee Gobolka Banaadir lagu qeexi doono maqaamka caasimadda sida ku cad Dastuurka KMG ah, sidoo kale, Heshiiska[35] GWQ wuxuu iftiimiyey in degmooyinka Gobolka Banaadir ay yeelanayaan goleyaal deegaan oo ay soo dooranayaan dadka deegaanka si toos ah, taasoo loo muddeeyey in ay dhacayso 30 June 2024. GMDHD wuxuu maqaamka caasimadda ka diyaariyey saddex xulushooyin oo ah kuwan hoos ku xusan:

## 2.10 Xulashooyinka Maqaamka Caasimadda.

**Xulashada 1aad :**
**Gobol Caasimad ah oo Hoosyimaadda Dawladda Federaalka**

1) Magaalamadaxda waxay noqoneysaa Gobol magaalamadax u ah Dawladda Federaalka.
2) Gobolka magaalamadaxda Federaalku kama mid noqon karto qayb ka mid ah dawlad goboleed.
3) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa in uu soo saaro xeer gaar ah oo nidaamiya is xukun dimuqaraaddi ah, oo lagu maamulo degmada Magaalamadaxda Federaalka.
4) Xeerka doorashooyinka federaalku waa in uu siiyaa muwaaddiniinta deggan Magaalamadaxda, xaq ay ku dooran karaan wakiillo u matala Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waana in aysan matalaaddaas ku waayin degganaanshada ay deggan yihiin Magaalamadaxda Dawlada Federaalka awgeed.

**Xulashada 2aad :**
**Caasimad Dawlad Goboleed ah**

1) Magaalamadaxda Federaalku waxay noqonaysaa dawlad goboleed; leh maqaam iyo xuquuq la mid ah kuwa Dawlad Goboleedyada.
2) Magaalamadaxda Federaalku kuma biiri karto gobol kale ma noqon karto qayb dawlad goboleed kale ku dhul ballaarsato.
3) Xukuumadda Dawlad Goboleedka ee Magaalamadaxda Federaalka iyo Xukuumada Federaalku waa in ay dhowraan mabaadii'da xiriirka iskaashiga ee ku xusan Dastuurkan. Waa in ay si gaar ah ugu heshiiyaan arrimaha canshuuraha iyo xeerarka kale ee nidaaminaya dhulalka iyo dhismooyinka ay leedahay ama ay deggan tahay Xukuumadda Federaalku ee ku dhexyaal Magaalamadaxda.

---

33 Heshiiska Habraaca Golaha Wadatashiga Qaran ee la saxiixay 31/10/2022.
34 Qodobka 4aad ee Heshiiska Doorashooyinka uu gaaray GWQ.
35 Qodobka 11aad ee Heshiiska Doorashooyinka uu gaarary GWQ.

**Xulashada 3aad:**
**Caasimad Ku-dhextaal Dawlad Goboleed**

1) Caasimadda Magaalamadaxda Federaalku waxay ahaanaysaa magaalo ku dhextaal dawlad goboleed.
2) Xukuumadda dawlad goboleedka ay Magaalamadaxdu ku dhextaal, iyadoo la tashanaysa Dawladda Federaalka waa in ay soo saartaa xeer gaar ah oo qeexaya maqaamka Caasimadda Federaalka.
3) Golaha maamul ee Caasimadda Federaalka, Dawlad Goboleedka ay ku taallo Magaalamadaxda iyo Xukuumadda Federaalku waa in ay ilaaliyaan mabaadii'da xiriir iskaashiyeedka ee uu dhigayo Dastuurku, waana in ay si gaar ah uga heshiiyaan arrimaha canshuuraha, xeerarka kale ee nidaaminaya dhulalka iyo dhismooyinka ay leedahay ama ay dheggentahay Xukuumadda Federaalku ee ku dhexyaal Magaalamadaxda.

## 2.11 Tusaalooyinka Caasimadaha Dalalka Federaalka Ah:

Magaalamadaxda Federaalka way ka duwan tahay casimadaha dawladaha leh nidaamka mideysan, sidaas daraadeed, inta badan dalalka federaalka waxay qaataan mid ka mid ah saddaxda nidaam ee lagu maamulayo maqaamka caasimadda ee kor ku xusan, waxaana xusid mudan in dalalku hal nidaam maqaam ay kusii kala duwan yihiin faahfaahinta la xiriirta qaabdhismeedka maamul, sharcidejinta, maaliyadda iyo garsoorkaba.

GMDHD wuxuu halkaan kusoo bandhigayaa qaar ka mid ah caasimadaha dalalka haysta nidaamka federaalka caalamka:

**Abuja:**

Magaalamadaxda dalka Nigeria ee Abuja waa tusaale caasimad ah oo hoostimaadda xukuumadda federaalka. Muwaaddiniinta deggan Abuja waxay matalaad ku leeyihiin heer federaal: Hal xubin ee Aqalka Sare (Aqalka labaad) iyo laba xubnood ee Aqalka Wakiillada. Sidoo kale, Madaxweynaha Federaalka ayaa u soo magacaabaya Wasiir ka tirsan Xukuumadda Federaalka mana laha Guddoomiye Gobol sidoo kale ma laha Baarlamaan la soo doortay ee waxaa kaalintaa qaadanaya Baarlamaanka Federaalka. Xukuumadda Federaalka ayaa leh dhammaan dhulalka iyadaana bixinayaa shahaada lahaanshaha dhulka.

**Washington DC**

Aasaasayaashii Washington DC ayaa go'aansaday in caasimaddu ay ka madaxbannaanaato xubnaha ka tirsan federaalka[36]. Dastuurka ayaa siinaya kongareeska awood buuxda oo uu ku maamulo caasimadda. Washington waxaa si tartiib tartiib ah loo siiyay madaxbannaani xaddidan[37] hase ahaatee, kongreeska ayaa wali ansixiya xeerarka iyo misaaniyaddaba ayagoo u soo gudbiya Madaxweynaha Federaalka si uu u ansixiyo. Washington DC kuma lahan wakiil Aqalka Sare, hase ahatee waxay leeyihiin hal xubin oo aan cod lahayn ee Aqalka Wakiillada.

36 Qodobka 1aad, faqradda 8(17), Dastuurka Maraykanka.
Article I, Section 8, Clause 17

37 [See, for further details of the contents of the Home Rule, the District of Colombia Home Rule Act of 1973, Public Law 93-198; Stat.774 D.C. Official Code 1-201.01 *et seq*. Approved December 24, 1973.

**Berlin**
Berlin waa caasimad dawlad goboleed ah oo si buuxda u leh awoodaha dawlad goboleedyada; waxayna wakiillo ku leedahay aqalka labaad ee baarlamaanka (Bundesrat) taasoo ku xiran saamiga baaxaddeed sida gobollada. Xukuumadda Federaalka ee Jarmalka kuma lahan saameyn toos ah arrimaha u gaarka ah ee caasimadda.

**Islamabad**
Magaalamadaxda dalka Pakistan waa Islamabad[38], waxayna ku leedahay matalaad buuxda labada aqal ee baarlamaanka (Majlis-e-Shoora).Golaha shacabka waxay ku leedahay laba kursi ee tirada guud oo ah 342 kursi, halka aqalka sare ay ku leedahay afar[39] kursi oo ka mid ah tirada guud oo ah 100 kursi.

**Ottawa**
Ottawa waxay ku taallaa gobol lagu magaacabo Ontario oo xuduud la leh gobolka Quebec; Inkastoo Ottawa loo qorsheeyay in ay tahay xarunta xukuumadda si la isugu dheelitiro luqadaha, hadana hay'ado federaal oo badan oo muhiim ah ayaa ku yaal Quebec.Waxaa la sameeyay Guddiga Caasimadda Qaranka sanadki 1959 waxaana awood loo siiyay in ay horumariyaan, dhowraan isla markaana wanaajiyaan Caasimad Goboleedka Qaranka si waafaqsan arrimaha muhiimka u ah qaranka.

## 2.12 Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 1aad

Qodobbada cutubka 1aad waxaan lagu sameeyay siiqeyn, qaabayn, toosin, ku daris, dhimis iyo wax-kabeddel xagga nuxur axkaamta ah. Waxaa la soo kordhiyey sagaal (9) faqradood; halka la tiray laba (2) faqrafood, sidoo kale, waxaa toosin iyo siiqeyn farsamo lagu sameeyey 21 faqradood, halka 2 faqradood sidoodii loo qaatay, sida ku cad jaantuska.

[38] Qodobka 1aad, faqradda 2aad, Dastuurka Dawladda Islaamiga ah ee Pakistan.
39 Hal kursi oo ka imaanaya culumada, hal kursi oo ka imaanaya haweenka, iyo laba kursi oo guud.

## 2.13 Jaantuska 1aad: Natiijada Wax-kabeddelka Cutubka 1aad

Jaantuskan hoose wuxuu muuqalinayaa: (a) faqradaha la soo kordhiyey; (b) faqradaha la tiray; (c) farqadaha toosin iyo siiqayn lagu sameeyey; iyo (d) qodobbada ama faqradaha sidoodii loo qaatay.



## 3. Faallada iyo Sharaxaada Wax-kabeddelka Cutubka 2aad

### Cutubka 2aad: Xuquuqda Asaasiga ah iyo Waajibaadka Muwaaddinka

Cutubkan wuxuu nidaaminayaa xuquuqda iyo xorriyaadka aasaasiga ah oo salka ku haya xuquuq Ilaaheey bixiyey. Soomaaliyana waxay qayb ka tahay heshiisyo caalami ah oo khuseeya xuquuqda aadanaha[40], waana tallaabo muhiim u ah in muwaaddin kasta xuquuqdiisa iyo xorriyaadkiisa lagu ilaaliyo Dastuurka.

Cutubkan labaad waxaa dhammaan qodobbadiisa lagu sameeyey toosin marka laga reebo hal qodob, waxaana lagu soo kordhiyey faqrado badan oo xeerinaya arrimo kala duwan oo ay ka mid yihiin:

- Xaqa ilaalinta xogta shakhsiga ah;
- Xaqa dhalinyarada;
- Xaqa rafcaan qaadashada;
- In aan loo gacan gelin karin muwaaddinka JFS dal shisheeye;
- Iskaalmaysiga sharciga ah ee caalamiga ah;
- In uusan jirin waqti u xaddidan furidda oogidda gal dacwadeedka gabbood fallada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha.

GMDHD wuxuu diyaariyey saddex xulusho si loo helo fahan dheeraad ah oo ku saabsan arrinta da'da, iyadoo loo bandhigi doono culimada Soomaaliyeed.

### MADAXA KOOWAAD: MABAADI'DA GUUD EE XUQUUQDA AADANAHA

### 3.1 Qodobka 10aad: Karaamada Aadanaha

Qodobkan soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa uu ka koobanyahay afar (4) faqradood halka asalka Dastuurka uu ahaa saddex (3) faqradood. Waxaa qodobka wax-kabeddelka Dastuurka lagu kordhiyey hal (1) faqrad oo cusub.

Faqradda 1aad ee qodobkan waxba lagama beddelin oo sideeda ayaa loo qaatay. Faqraddan waxay muujinaysaa in karaamada aadanaha ay tahay deeq Ilaaheey Subxaanahu Watacaalaa bixiyey.Taas oo macnaheedu yahay haddii xuquuqda aadanaha uu gole ama hay'ad dawladeed bixiso waa lala noqon karaa laakiin markii Ilaaheey bixiyo cidna lama noqon karto.

---

[40] Universal Declaration of Human Rights, https://www.un.org/en/about-us/universal-declaration-of-human-rights; International Covenant on Civil and Political Rights, https://www.ohchr.org/en/instruments-mechanisms/instruments/international-covenant-civil-and-political-rights ; International Covenant on Economic, Social and Cultural Rights, https://treaties.un.org/doc/treaties/1976/01/19760103%2009-57%20pm/ch_iv_03.pdf ; Convention Against Torture and other Cruel, Inhman or Degrating Treatment or Punishment, https://www.ohchr.org/en/instruments-mechanisms/instruments/convention-against-torture-and-other-cruel-inhuman-or-degrading ; International Convention on the Elimination of All Forms of Racial Discrimination, https://www.ohchr.org/en/instruments-mechanisms/instruments/international-convention-elimination-all-forms-racial ; Convention on the Rights of the Child, https://www.ohchr.org/en/instruments-mechanisms/instruments/convention-rights-child .

Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waxba lagama beddelin oo sideeda ayaa loo qaatay.Faqraddan waxay ku saabsan tahay in aan karaamada aadanaha lagu xadgudbi karin, dhawristeeduna saaran tahay qof kasta.

Faqaradda 3aad ee qodobkan waxaa la tiray ereyada “meel-uga-dhicid” iyadoo lagu beddeley ereyga “xadgudub” oo ah mid ku habboon macna ahaanna ka qoto-dheer.

Faqradda 4aad ee qodobkan ee wax-kabeddelka Dastuurka waa cusubtahay waxaana lagu soo kordhiyey qodobkaan, balse nuxurkeeda waxaa laga soo raray qodobka 14aad ee asalka Dastuurka, iyada oo lagu daray qodobka 10aad ee soo jeedinta wax-kabeddelka dastuurka. Sababta loo soo raray faqraddan ayaa ah ayadoo loo arkay inay la xiriirto karaamada aadanaha oo qodobkan xeerinayo.

**3.2 Qodobka 11aad: Sinnaanta**

Qodobkan soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa uu ka koobanyahay afar (4) faqradood, si la mid ah asalka Dastuurka ka koobnaa afar (4) faqradood maaddaama hal faqradna la tiray.

Farqadda 1aad ee qodobkan waxaa lagu soo kordhiyay “midab, isir iyo da’” si aysan u noqon halbeegyo lagu faquuqo, laguna takooro qof jooga geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, loona adkeeyo sinnaanta muwaaddiniinta Soomaaliyeed iyo dadka ku nool JFS. Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waa la tiray, sababtuna waa inay soo noqnoqoneyso, nuxurkeedana lagu sheegay faqradda 3aad ee isla qodobkan.

Faqradda 2aad ee qodobkan ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxba lagama beddelin nuxuurkeeda, waxa laga tiray ereyga “xukuumadda” si falalka takooridda ku salaysan aysan keligeed ku koobnaan balse ay u hoggaansamaan cidkasta. Faqraddan waxa kale oo lagu soo daray ereyada “si toos ah ama dadban”, si loo daboolo arrimihii ay xeerinaysay faqradda 2aad ee qodobkan ee sida kor lagu xusay. Dastuurka dalka Kenya[41], Qodobka 27aad, faqradda 4aad ayaa reebaysa takoorka oo u dhaca si toos ah ama si dadban. Qaabkan ayaana wanaagsan in hal farqad lagu soo koobo macnaha intii laba faqradood laga dhigi lahaa sidii ay u hore ugu xusneyd asalka Dastuurka.

Nuxurka Faqradda 3aad ee qodobkan waxba lagama beddelin balse waxaa ereyga “xukuumadda” lagu beddelay “dawladda” iyo ereyga “shuruucda” oo lagu beddelay “xeerarka”, si loo ballaariyo macanaha oo ay u daboosho dhammaan qaybaha kala duwan ee dawladda.

Faqradda 4aad waxaa loo soo kordhiyey in si cad loogu qeexo Dastuurka in ayadoo laga duulayo mabda’ sinnaanta, in qofna uusan ka baxsan karin ciqaabta dembi uu galay isaga oo la eegayo maqaamka iyo maamuuska uu leeyahay.

[41] Qodobka 27aad, faqradda 4aad ee Dastuurka Kenya 2010

### 3.3 Qodobka 12aad: Dhaqangelinta Xuquuqda Asaasiga ah

Qodobkan soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay laba (2) faqradood, halka uu asalka dastuurka ka ahaa saddex (3) faqradood.

Faqradda 1aad ee qodobkan waxba lagama beddelin nuxurkeeda, waxaa loo qoray hab qaanuuneed. Marka laga hadlayo xuquuqda aadanaha lama rabo in loo hoggaansamo oo keli ah, ee waxaa lagama maarmaan ah in la ilaaliyo lana ixtiraamo, waana in la ilaaliyaa oo ficil lala yimaadaa, waa in la ixtiraamaa oo aan la faragelin, waana in la fuliyaa. Saddexdaas qaybood ayey iskugu jirtaa dhaqangelinta xuquuqda aadanaha.

Xuquuqda aadanaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah waxaa si guud loogu kala saaraa xuquuq taban iyo mid togan[42]. Xuquuqda togan waxaa waajib ah in aan la faragelin. Xaqa togan waa xaq u baahan in tallaabooyin la qaado oo la hirgeliyo. Xaqa ama xoriyadda taban waxaa ka mid ah xaqa uu qofku u leeyahay in uu hadlo (freedom of speech), xaqa qofku u leeyahay sirnimada arrimihiisa khaaska ah (right to privacy). Tusaalaha xaqa togan waxaa ka mid ah xaqa waxbarashada, sababtaas ayaa loo isticmaalay ereyada "ilaaliyaan, ixtiraamaan, hirgeliyaan" oo kala khuseeya xuquuqdaas kor ku xusan.

Faqradda 2aad ee qodobkan ee waxaa lagu qoray hab qaanuuneed iyadoo nuxurka waxba laga beddelin. Ereyga "dhowrto" waxaa lagu beddelay "ilaalisaa, dammaanad qaaddaana". Faqradda 3aad ee qodobka oo xeerinaysa xaddidaadda xuquuqda waa la tiray, sababta loo tiray faqraddan waa in ay tahay mid ku celis ah oo tilmaamaysa arrin si dhammeystiran loogu xeeriyey qodobka 38aad ee Dastuurka.

## MADAXA LABAAD: XUQUUQDA, XORRIYAADKA AASAASIGA AH EE QOFKA IYO XADDIDAADOODA

### 3.4 Qodobka 13aad: Xaqa Nolosha

Qodobkan wuxuu ka koobanyahay saddex (3) faqradood, halka uu asalka Dastuurka ka ahaa hal (1) faqrad.

Faqradda 1aad waxba lagama beddelin oo sideedii baa loo qaatay. Faqradda 2aad ee qodobkan oo xeerinaysaa in xaqa nolosha yahay mid dabiici ah oo banii'aadamku leeyahay, Ilaahayna siiyey waa mid cusub oo la soo kordhiyey. Sababta faqradda 2aad loogu soo kordhiyay qodobkaan ayaa ah in xaqa nolosha ee lagu soo sheegay faqradda 1aad, lana xaddidi karo si waafaqsan xeerka, marka qofku uu la yimaado ama galo faldembiyeed oo uu ku waayi karo xaqaasi. In xaqaan uu yahay mid aan banii'aadam bixin in la muujiyo waa muhiim, waxaana ka dhalanaya in la ilaaliyo xaqaas illaa asbaab kooban oo xeerku tilmaamayo in lagu waayo ma ahane aan la qaadi karin.

[42] https://www.unodc.org/e4j/zh/tip-and-som/module-2/key-issues/positive-and-negative-obligations-of-the-state.html ; https://www.constitutionalstudies.ca/2019/07/positive-and-negative-rights/ .

Faqradda 3aad ee qodobkan waa mid ku cusub qodobkan ee wax-kabeddelka Dastuurka balse waxaa laga soo raray qodobka 15aad, faqradda 5aad ee asalka dastuurka. Sababta loo soo raray ayaa ah inay xiriir la leedahay xaqa nolosha, maaddaama ay noloshu ka billaabato marka ilmuhu calool galo.

### 3.5 Addoonsi, Midiidin iyo Ku-shaqaysi Qasab ah

Qodobka 14aad ee asalka Dastuurka waxaa loo raray qodobka 10aad, faqraddiisa 4aad ee isla cutubkan, maaddaama qodobkaas xeerinayey karaamada aadanaha oo arrimaha lagu xeerinayey qodobkaas lagu nidaamiyey.

### 3.6 Qodobka 14aad: Xorriyadda iyo Nabadgelinta Qofnimada

Qodobka 14aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay afar (4) faqradood, halka uu asalka Dastuurka ka ahaa shan (5) faqradood.

Faqradda 1aad ee qodobkan waxay tilmaameysaa xaqa uu qofku u leeyahay xorriyaddiisa shaqsiga ah iyo nabadgelyada qofnimadiisa, waxba lagama beddelin oo sideedii ayaa loo qaatay. Nuxurka faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka oo reebaysa in qof loo gaysto jirdil ama lagula kaco fal bani'aadanimada ka baxsan, waxba lagama beddelin, waxaa loo qoray hab qaanuuni ah. Sida aan horay u soo xusnay, Soomaaliya waxay qayb ka tahay heshiisyo caalami ah oo si cad u diidaya in aan qofna jirdil ama fal arxandarro ah oo bani'aadannimada ka baxsan lagula kici karin. Tusaale ahaan, Qodobka 2aad, faqradda 1aad ee Heshiiska Lidka ku ah Jirdilka iyo Kuwa Kale ee Arrxan Darro Aadaminimada Lid ku ah ama Hab Dhaqan Quursasho, ama Ciqaab "Convention Against Torture and other Cruel, Inhuman or Degrading Treatment or Punishment[43]" wuxuu dalalka heshiiska qaybta ka ah, oo ay Soomaaliya ka midka tahay, ku waajibinayaa in ay qaadaan tallaabooyin qaanuun, maamul, garsoor iyo kuwo kale oo ay uga hortagayaan in ayna geyigooda ka dhicin falal jirdil ah. In arrinkan dastuurka lagu xeeriyo waxay Soomaaliya ka rideysaa mas'uuliyad caalami ah oo ka dhalatay heshiis ay qayb ka tahay.

Faqradda 3aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka, oo tilmaamaysa xaqa badqabka jirka in uu yahay laguma xadgudbaan, sideedii ayaa loo qaatay oo waxba lagama beddelin. Sidoo kale, faqradda 4aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waxaa lagu qoray hab kooban oo qaanuuni ah, nuxurka faqradana waxba lagama beddelin.

Faqradda 5aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waxaa loo raray Qodobka 13aad, faqradda 3aad ee qabyoqoraalka wax-kabeddelka Dastuurka, sababta loo raray faqradda oo xeerinaysa in aan ilmaha la soo ridi karin, waxay xiriir la leedahay xaqa nolosha, maaddaama ay nolosha ka billaabato marka ilmaha calool galo.

43 https://www.ohchr.org/en/instruments-mechanisms/instruments/convention-against-torture-and-other-cruel-inhuman-or-degrading

### 3.7 Qodobka 15aad: Xorriyadda Ka-midnoqoshada

Qodobka 15aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa uu ka koobanyahay hal (1) faqro, si la mid ah asalka dastuura. Nuxurka qodobkaan waxba lagama baddelin. Ereyada "qof kale ama koox" waxaa lagu beddelay "dad kale" oo ah macne koobaya soona gudbinaya machana labada erey oo la beddelay.

### 3.8 Xorriyadda Diinta iyo Caqiiddada

Qodobka 16aad ee asalka dastuurka Dastuurka waa la tiray kadib soojeedinta latashiga culumada soomaaliyeed.

### 3.9 Qodobka 16aad: Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta

Qodobka 16aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay laba (2) faqradood, halka uu asalka Dastuurka ka ahaa saddex (3) faqradood.

Faqradda 1aad ee qodobkan waxaa loo qoray hab qaanuuneed oo la fahmi karo iyadoo aan nuxurka waxba laga beddelin. Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 1aad ee qodobkan, waxayna tilmaameysay waxyaabaha ka midka noqon kara xorriyadda afkaarta iyo ra'yiga, taas oo faqradda 1aad ee qodobkan lagu xusay. Faqradda 1aad waxaa kale oo lagu daray ereyada "si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya". Sababta loo waafajinayo xeerarka dalka waa in ayna noqon xorriyad furan oo taabanaysa xaquuqda iyo xorriyadaha dadka kale ee ku nool geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Taas macnaheedu waxay tahay in xaqa qodobkani bixinayo ay xaddidayaan xeerarka dalka iyo in aan xaqaan loo isticmaali karin waxyeelaynta dad kale.

Si loo sugo mas'uuliyadda dadka soo bandhigaya aqoontooda ama hal abuurkooda, farqadda 2aad ee qodobkan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah waxaana lagu kordhiyey ereyada "faafreeb la'aan".Sababta loogu soo daray faafreeb la'aan ayaa ah in aan loo baahan in qofku qoraalkiisa uu soo marsiiyo meel lagu faafreebayo. Xaqaan waxaa lagu xaddidi karaa xeer uu Baarlalaamka Soomaaliya soo saaro sida ku cad Qodobka 38aad ee qabyoqoraalka wax-kabeddelka Dastuurka.

### 3.10 Qodobka 17aad: Xurmada Hoyga

Qodobka 17aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka kooban yahay hal (1) faqro, halka uu asalka Dastuurka ka ahaa laba (2) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan waxaa loo qorey hab qaanuuneed, ereyga "Gurigiisa" waxaa lagu beddeley "hoygiisa".Sidoo kale, ereyada "meeshii kale ee isaga u gaar ah" waxaa lagu beddely "waxyaabaha u gaarka ah". Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waxaa la soo jeediyey in la tiro maaddaama nuxur ahaan ay ku jirto faqradda kore iyo qodobka 35aad, faqradda 2aad.

### 3.11 Qodobka 18aad: Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsi-wadareedka

Qodobka 18aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay laba (2) faqradood, si la mid ah asalka Dastuurka. Faqradda 1aad ee qodobkan sideeda ayaa loo qaatay marka laga reebo soo kordhinta ereyga “taageero” iyo “si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya”. Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka iyana waxaa lagu sameeyey toosin kooban.

### 3.12 Qodobka 19aad: Xorriyadda Isu-socodka iyo Degitaanka

Qodobka 19aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay saddex (3) faqradood halka uu asalka Dastuurka ka ahaa laba (2) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, siiqada iyo hab qoraalkeeda ayaa la toosiyey. Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka iyana waxba lagama beddelin oo sideeda ayaa loo qaatay. Qodobkan wax-kabeddelka Dastuurka waxaa lagu soo kordhiyey faqradda 3aad, ayada oo nuxurkeeda laga soo qaatay faqradda 2aad ee qodobkan, waxayna xeerinaysaa in uu muwaaddin kasta xaq u leeyahay in uu helo baasabboor, aqoonsiga qaranka iyo dokumiinti kasta oo ay dawladdu soo saarto.

### 3.13 Qodobka 20aad: Xaqa Ka-qaybgalka Siyaasadda

Qodobka 20aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay seddex (3) faqradood, si la mid ah asalka Dastuurka.

Faqradda 1aad ee qodobkan waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn, iyadoo laga dhigay hal faqro lagana saaray xarfaha (a) iyo (b), waxaana farqaddan lagu soo kordhiyey “si waafaqsan xeerarka JFS”, iyo ereyga “jago” waxaa lagu beddelay “xil”, xarfaha (a) oo la tiray waxay tilmaamaysay in qof kasta samayn karo, kana mid noqon karo xisbi siyaasadeed. Xarafka (b) oo la tiray isna wuxuu muujinayey in qofka xisbiga siyaasadda gudihiisa looga dooran karo jago. Arrimaha ay xarfahaan xeerinayeen waxaa lagu daray faqradda 1aad ee qodobkan.

Faqradda 2aad oo xeerinaysa in muwaaddin kasta oo soo buuxiya shuruudaha xeerarku dajinayaan wuxuu xaq u leeyahay in uu wax doorto lana doorto. Faqradda 3aad ee qodobkan waxba lagama beddelin nuxurkeeda ee waxaa lagu sameeyey toosin.

### 3.14 Qodobka 21aad: Xorriyadda Xirfadda, Shaqada iyo Mihnadda

Qodobka 21aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay hal (1) faqrad, si lamid ah asalka Dastuurka. Qodobkan wuxuu xeerinayaa in muwaaddin kasta xaq u leeyahay in uu si xor ah u doorto xirfadda, shaqada iyo mihnadda uu rabo, oo aan laga hor istaagi karin ama lagu qasbi karin mid uuna rabin. Faqraddaan sideedii baa loo qaatay, waxna lagama beddelin.

### 3.15 Qodobka 22aad: Xuquuqda Shaqaalaha

Qodobka 22aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay lix (6) faqradood, halka uu asalka Dastuurka ka ahaa shan (5) faqradood. Faqradda 1aad, sideedii baa loo qaatay. Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka oo tilmaamaysey in qof kasta oo shaqaale ah oo ku sugan geyiga JFS uu xaq u leeyahay in uu ka mid noqdo, abuurana urur shaqaale si waafaqsan xeerarka dalka, waxba lagama beddelin nuxurkeeda, sideedii baa loo qaatay.

Faqradda 3aad ee qodobkan oo tilmaamaysa xaqa shaqo joojin, waxaa loogu kordhiyay in aan xaqa shaqo joojintu waxyeelin danta guud, habsami u socodka hawlaha aasaasiga ah iyo dhawrista nabadgelyada guud. Faqradda 4aad iyo 5aad ee qodobkan sidooda ayaa loo qaatay, waxna lagama beddelin.

Faqradda 6aad waa mid cusub, waxaana loogu soo daray si loo ilaaliyo xuquuqda shaqo ee dadka naafada ah iyo in ay helaan dhammaan waxyaabaha u fududayn kara gudashada shaqadooda. Soomaaliya waxay qayb ka tahay Heshiiska Xuquuqda Dadka Naafada ah "UN Convention on the Rights of Persons with Disabilities[44]" oo aan qayb ka noqonnay 6 Agoosto 2019. Qodobka 27aad ee heshiiskaas ayaa dawladaha qaybta ka ah, oo ay Soomaaliya ka midka tahay, ku waajibinaya in ay xaqa dadka naafada ah u leeyihiin xuquuq shaqo oo la mid ah dadka aan naafada ahayn.

### 3.16 Qodobka 23aad: Deegaan iyo Bii'ad Nadiif ah

Qodobka 23aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay laba (2) faqradood, si la mid ah asalka Dastuurka. Faqradda 1aad ee qodobkan waxba lagama beddelin ee sideeda ayaa loo qaatay. Faqradda 2aad ee qodobkan siiqo toosin ayaa lagu sameeyey.

Dalal badan oo qaaradda Afrika ah ayaa dastuurradooda ku xeeriyey xaqa bii'ad ama deegaan nadiif ah oo aan caafimaadka waxyeello u gaysanayn. Qodobka 24aad ee Dastuurka Koofur Africa[45] wuxuu xeerinayaa in qof kasta xaq u leeyahay bii'ad aan khatar ku ahayn caafimaadka iyo bedqabka oo loo ilaaliyo jiilkan iyo jiilasha soo socda. Dawladda Koofur Afrika wuxuu qodobkan waajib ka dhigayaa in ay soo saarto xeerar looga hortagayo wasaqaynta deegaanka, waxyeellaynta khayraadka dabiiciga ah iwm. Sidoo kale, qodobka 42aad ee Dastuurka Kenya[46] wuxuu qof kasta siinayaa xaqa bii'ad nadiif ah oo caafimaad qabta. Sidaa si lamid ah, qodobka 39aad ee Dastuurka Uganda[47] wuxuu muwaaddin kasta ee dalka Uganda siinayaa xaqa bii'ad nadiif ah oo caafimaad qabta.

---

[44] https://www.ohchr.org/en/instruments-mechanisms/instruments/convention-rights-persons-disabilities
[45] Qodobka 24aad ee Dastuurka Koofur Afrika.
[46] Qodobka 42aad, Dastuurka Kenya.
[47] Qodobka 39aad ee Dastuurka Uganda.

### 3.17 Qodobka 24aad: Hantida Gaarka Loo Leeyahay

Qodobka 24aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa uu ka koobanyahay laba (2) faqradood sidii uu awalba ahaa asalka Dastuurka. Faqradda 1aad ee qodobkan waxaa loo habeeyay loona qoray hab qoris qaanuuneed, ayadoo aysan waxba ka beddelin nuxurka faqradda, waxaana la beddeley ereyga "ku naalloodo" oo lagu beddeley "ka faa'ideysto". Sidoo kale, ereyga "iska wareejiyo" waxaa lagu beddeley "hibeeyo". Faqradda 2aad ee qodobkan siiqo toosin ayaa lagu sameeyey.

### 3.18 Qoodbka 25aad: Xuquuqda Bulshada

Qodobka 25aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay afar (4) faqradood, halka uu asalka Dastuurka ka ahaa shan (5) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan waxba lama beddelin ee sideeda ayaa loo qaatay. Faqradda 2aad ee qodobkan waxaa loo qorey hab qaanuuni ah. Faqradda 3aad ee qodobkan oo xeerinaya in qof kasta xaq u leeyahay daryeel bulsho oo dhammeystiran, sideeda ayaa loo qaatay.

**Maxaa loola jeedaa Daryeelka Bulshada**

Waa nidaam ay bulshadu u dammaanad qaaddo daryeelidda dadka shaqo la'aanta ah, hawlgab, jirrada, agoonta iyo xaaladaha kale ee adag uu qof bulshada ka mid ah uu la kulmo. Dammaanad qaadkaas oo ku salaysan lacag laga gooyo dadka inta ay shaqaynayaan, caymis dadka qaar galaan iyo daryeelka oo laga bixiyo dakhliga guud oo dalka laga aruuriyo. Daryeelkaas waxaa xaq loogu yeeshaa in qofku wax ku darsado, ama in ay ku xiran tahay dhaqaalaha soo gala qofka iyada oo daryeelka la gaarsiinayo dadka u baahan.

Soomaaliya ma soo yeelatay nidaamkan dammaanad qaadka bulshadeed nooc ka mid ah? Waa su'aal muhiim ah in la isweydiiyo mudan.

Soomaaliya waxay lahaan jirtay wakaalad la oran jiray "Sanduuqa Ceymiska Bulshada Soomaaliyeed" "Cassa per le Assicurazione Sociale Somalo (CASS). Qof kasta oo u shaqeeya dawladda ama shirkadaha gaarka loo leeyahay wuxuu lahaa lambar aqoonsi wuxuu kaloo wakaaladda kor ku xusan uga furneed xisaab uu leeyahay. Nidaamkan ma gaarsiisnayn bulshada dhan laakiin wuxuu ku ekaa oo keliya dadka shaqaalaha ah.

Farqadda 4aad ee qodobkan waxaa loo beddeley si loo caddeeyo mas'uuliyadda ka saaran dawladda taabbagelinta xuquuqdan, iyadoo si gaar ah u tixgelineysa haweenka, dadka da'ada ah iyo naafada ah. Sidoo kale, qodobkan waxaa lagu soo kordhiyey faqradda 5aad oo si gooni ah u xeerinaysa in si gaar ah mudnaan loo siiyo dadka nugul sida haweenka, waayeelka, carruurta iyo dadka naafada ah.

### 3.19 Qodobka 26aad: Daryeelka Qoyska

Qodobka 26aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay lix (6) faqradood, halka uu asalka Dastuurka ka ahaa shan (5) faqradood.

Faqradda 1aad ee qodobkan oo tilmaamaysa in guurku yahay aasaaska qoyska iyo saldhigga oo ah bulshada, mas'uuliyadda ilaalintiisu in ay saaran tahay dawladda heerarkeeda kala duwan, waxba lagama beddelin oo sideedii baa loo qaatay.

Farqadda 2aad ee qodobkan waa mid cusub oo la soo kordhiyey, ujeeddada loo soo kordhiyeyna waa in guurku waafaqsanaado Shareecada Islaamka iyo xeerarka JFS. Muhiimad weyn ayey leedahay in faqraddan cusub lagu soo daro cutubkan, sababtoo ah adduunka waxaa ka socda dhaqdhaqaaqyo xoog badan oo wax loogu dhimayo guurka soo jireenka ah.

Faqradda 3aad ee qodobkan waxaa lagu kordhiyey ereyada "carruurta" iyo "qaran". Faqradda 4aad ee qodobkan waxaa lagu kordhiyey ereyga "toosan", waxaana la beddelayereyada "cid kale" oo lagu beddeley "xigtadiisa", haddii xigtadiisa ay xannaaneyn weyso dawladda ayaa kafaala qaadeysa xannaanada carruurta. Sidoo kale, waxaa la beddelay ereyada "carruurta dariiq-jooga ah" laguna beddelay "carruurta dayacan".

Faqradda 5aad ee asalka Dastuurka, oo waxna laga beddelin, nuxurkeeda loo raray faqradda 2aad ee qodobkan oo xeerinaysa in qof kasta oo qaangaar ah xaq u leeyahay guur waafaqsan shareecada iyo xeerarka dalka. Faqradda 6aad waa mid cusub oo qodobkan lagu soo kordhiyey, waxayna tilmaamaysaa in Baarlamaanka Soomaaliya soo saarayo sharci khaas ah oo xeerinaya arrimaha qoyska.

### 3.20 Qodobka 27aad: Xuquuqda Carruurta

Qodobka 27aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay toddoba (7) faqradood halka uu asalka Dastuurka ka ahaa siddeed (8) faqradood, maaddaama faqradda siddeedaad loo raray faqradda 2aad ee isla qodobkan.

Faqradda 1aad waxaa lagu daray ereyada "diiwaangelin rasmi ah", si mustaqbalka loo diiwaangeliyo dhammaan muwaaddiniinta Soomaaliyeed, waxaana laga tiray ereyga "jinsiyad" maaddaama carruurta ku dhalata Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay isugu jiri karaan kuwa ah muwaaddiniin Jamhuuriyadda Soomaaliya ay dhaleen iyo kuwa shisheeye ay dhaleen. Sidaas awgeed, ayaa faqraddan looga tiray ereyga jinsiyad si ubadka shisheeyaha dhaleen ee ku dhasha Soomaaliya looga reebo xaqa helidda jinsiyadda iyadoo loo sababaynayo ku dhalashada geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Faqradda 2aad waxaa laga soo raray qodobkan faqradiisa 8aad ee asalka Dastuurka. ah siiqada faqraddan waxay kulminaysaa labada arrimood ee kala ah da'da qaangaarnimada (baaluqidda) oo ah 15 sano iyo da'da xilkasnimada (sinnu Rushd) ee 18 ka ah.

Faqradda 2aad ee qodobkan ee waxaa laga soo raray faqradda 8aad ee qodobkan.

**Cilmibaaris La xiriirta Da'da:**

GMDHD wuxuu diyaariyey cilmibaaris la xiriirta da'da: Si kooban arrinta da'da looga baxo carruurnimada, dalalka caalamku waa ku kala duwan yihiin, waxayna da'daas dalalku u dhexeysaa 15sano ilaa 21sano. Inta badan dalalku ayaa qaba in da'da lagu qaangaaro tahay 18 sano sidoo kale dalalku waxay qaarkood ku nidaamiyaan da'da dastuurrada halka qaar kale ay ku kala duwan yihiin xeerarka khuseeya. Marka laga hadlayo da'da, waxaa la xiriira arrimo badan oo ay ka mid yihiin da'da qaangaarka, da'da waxbarashada, da'da ay mamnuuc tahay in u shaqeeyo cunugu, da'da guurka, iwm.

Qaar ka mid ah dastuurada dalalka muslimka waxay ku qeexeen in carruuur loola jeedo qofka kasta oo da'diisu ka yartahay 18 sano, dalkaas waxaa ka mid ah Masar[48], Kuwait, Sudan, Algeria iyo Azerbajian[49], halka dalalka qaar ay kala saaraan da'da oo ay leeyihiin dhowr da'ood oo kala duwan sida Malaysia[50], Pakistan[51] iyo Tunsia.[52]

Sidoo kale, waddamada Muslimka ah arrimaha da'ada carruurta siyaabo kala duwan ayey u xeeriyaan. Tusaalaha da'da guurka: dalka Algeria da'da guurka ragga iyo dumarkaba waa 19 sano, laakiin da'a intaas ka yar waa lagu guursan karaa haddii la helo oggolaanshada waalidka. Dalka Bahrain[53], dad'a ugu yar ee guurka gabdhaha waa 15 sano halka ay wiilasha ka tahay 18 sano, waxaana jira xaalado khaas ah oo oggolaanaya guurka da'da intaas ka yar haddii maxkamadaha shareecadu oggolaadaan.

**Aragtida Madahaabibta Fiqiga Islaamiga ah:**

Fuqahada waxay isku raacsanyihiin in qaangaarku u noqdo laba midkood: (a) Calaamado ama tilmaamo gaar ah oo kasoo muuqday wiilka ama gabadha, ama (b) Gaaridda da'da cayiman oo qofku uu noqonayo qof qaagaar ah.

Fuqahada ama xeel-dheerayaasha fiqiga Islaamku waxay ku kala aragti duwan yihiin da'da uu qofku ku qaangaarayo, waxaana jira dhowr aragti oo kala duwan:

---

48 Qodobka 80, Dastuurka Masar, 2014( Dib-u-eegis lagu sameeyey, 2019)
49 Qodobka 34 ee Dastuurka Azerbaijan, 1995(Dib-u-eegis lagu sameeyey 2016)
50 Qodobada 12(4), 15A iyo 19 ee Dastuurka Malaysia, 1957(Dib-u-eegis lagu sameeyey 2007)
51 Qodobada 10A iyo 25A, Dastuurka Pakistan, 1973( Dib-u-eegis lagu sameeyey 2002 iyo 2018)
52 Qodobka 39, Dastuurka Tuunisiya,2014
53 Faaffaatinta arrinkan ku saabsan ee dalal badan, fiiri : https://assets.pewresearch.org/wp-content/uploads/sites/12/2016/09/FT_Marriage_Age_Appendix_2016_09_08.pdf

| Aragtida 1aad | Aragtida 2aad | Aragtida 3aad |
| --- | --- | --- |
| 15 sano in uu qofku gaaro, aragtidaan waxaa qaba fuqahada Shaaficiyada[54] iyo Xanaabilada[55], | 18 Sano, waa aragtida inta badan Maalikiyada[56] iyo Xanafiyada[57]. | 19 Sano jir, waxaa aragtida qaatay qaar kamid culumada Maalikiyada iyo Xanafiyada iyo Daahiriyada |

Waxaa jirta aragtiyo kale oo kala saaray gabdhaha(17 jir) iyo wiilasha(18 jir). Culumada muslimiintu waxay la xiriiriyaan arrinta da'da qaangaarka ah axkaam kale oo ay kamid yihiin "Ahliyah al Adaa أهلية الأداء " iyo " Rushdi الرشد"

Da'da qaargaarka marka laga hadlayo waxay la tixgaliyaa xilkasnimo, xilqaanimo iyo koritaanka caqli iyo jir ee cunugga. Waxaa jira Aayado iyo Axaadiis loo soo qaato arrimaha da'da qaangaarka iyo sidoo kale xilqaanimada. Allaahu Subxaanahu wa Tacaalaa (SWT) wuxuu ku sheegay Qur'aanka Kariimka ah[58] :

(ولا تؤتوا السفهاء أموالكم التي جعل الله لكم قياما وارزقوهم فيها واكسوهم وقولوا لهم قولا معروفا
وابتلوا اليتامى حتى اذا بلغوا النكاح فإن آنستم منهم رشدا فادفعوا اليهم أموالهم

Kadib latashiga culimmada soomaaliyeed, GMDHD wuxuu u siiqeeyey faqradda 2aad siditan: (Ereyga "carruur" ee qodobkan ku xusan waxaa loola jeedaa qof kasta oo ka yar da'da qaangaarnimada ee 15 sano, halka da'da xilkasnimaduna ay tahay 18 sano, iyadoo lagu faahfaahinayo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya).

Faqradda 3aad ee qodobkan 28aad waxba lagama beddelin oo sideeda ayaa loo qaatay. Faqradda 4aad ee qodobkan nuxurkeeda waxba lagama beddelin ee waxaa loo qoray hab qaanuuneed, waana la toosiyey. Farqadda 5aad ee qodobkan waa la tiray, sababta loo tiray waxay tahay, waa in aan lagu soo koobin oo keliya carruurta helidda xaqaan, laakiin qof kasta oo eedaysane ah oo aanan awoodin inuu bixiyo qarashka qareenka marka dacwad faldembiyeed lagu soo oogo uu xaqaas leeyahay. Qodobka 35aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka ayaa si dhammeystiran u faahfaahinayo xaqa eedaysanaha.

Faqradda 6aad ee qodobkan sideeda ayaa loo qaatay oo waxba lagama beddelin, sidoo kale faqradda 7aad oo tilaamaysa in danta carruurta mudnaanta la siinayo mar kasta oo ay joogto arrin maslaxaddooda khusaysa, sideeda ayaa loo qaatay. Faqradda 8aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waxaa loo raray faqradda 2aad ee qodobkan, maaddaama ay macne ahaan iyo isla socodka faqradaha ay sidaas ku habboon tahay.

[54] ، محي الدين النووي/المجموع، 13/359-364، محمد بن أحمد الشربيني –الشافعي- (ت: 977هـ)/مغني المحتاج إلى معرفة معاني ألفاظ المنهاج، 2/165-167 دار إحياء التراث العربي – بيروت، طبعة 1958م.
[55] عبد الله بن قدامه/المغني، 4/513-518، عبد الرحمن بن قدامة: شمس الدين ابي الفرج عبد الرحمن بن ابي عمر المقدسي –الحنبلي- (ت: 682هـ)/الشرح الكبير، دار الكتاب العربي – بيروت، طبعة بالأوفسيت، 4/512-515
[56] الحطاب الرعيني/مواهب الجليل، 5/56
[57] السرخسي: شمس الأئمة أبي بكر محمد بن ابي سهل (ت483هـ)/المبسوط، دار المعرفة للطباعة والنشر والتوزيع – بيروت، 1986م، 6/53 ، ظ: ابن نجيم المصري: زين الدين بن إبراهيم بن محمد الحنفي (ت: 970هـ)/البحر الرائق –شرح كنز الدقائق-، دار الكتب العلمية – بيروت، ط1 (1997م)، 6/70 ، العلّامة الحلي/تذكرة الفقهاء، 14/179
[58] سورة النساء - الآية 5

Sida aan horey u soo xusnay, Soomaaliya waxay qayb ka tahay Heshiiska Xuquuqda Carruurta oo dalalka qaybta ka ah heshiiska oo waajibaad badan ka imanaya in xuquuqda carruurta lagu muujiyo xeerarka dalka[59].

### 3.21 Qodobka 28aad: Waxabarashada

Qodobka 28aad ee soojeedinta wax-kabeddelka dastuurka wuxuu ka koobanyahay sagaal (9) faqradood halka uu asalka Dastuurka ka ahaa siddeed (8) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan oo xeerinaysa in waxbarashadu tahay xuquuq asaasi ah oo ay muwaaddiniintu leeyihiin waxba lagama beddelin oo sideedii ayaa loo qaatay. Faqradda 2aad ee qodobkan waxba lagama beddelin, waxaa keliya oo ereyada “dhamaan muwaaddiniinta”, lagu bedeley “muwaaddin kasta”.

Faqradda 3aad ee qodobkan oo xeerinaysa qasabnimada waxbarashada hoose iyo dhexe waa mid cusub, sababta loogu soo daray faqraddan waxay tahay in sare loo qaado aqoonta shacabka Jamhuuriyadda Soomaaliya waajibna looga dhigo qof kasta waxbarashada dugsiga hoose dhexe.

Faqradda 4aad ee qodobkan waxaa laga dhigay “heerarka kala duwan ee dawladda” halkii ay awal ka ahayd “Xukuumadda”, maaddaama nidaam federal ah uu dalka ka jiro. Dawladda Federaalka iyo Dawlad Gobaleedkaba waxaa saaran waajibka horumarinta, fidinta iyo baahinta waxbarashada guud.

Faqradda 5aad oo qodobkan waxaa lagu soo kordhiyey ereyada, “heerarka dawladda, tacliinta sare, machadyada farsamo, tiknoolijiyada, cilmi barista, hal-abuurka, ciyaaraha iyo hiddaha iyo Dhaqanka”. Faqradda 5aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waxaa la tiray, nuxurkeeda waxaa lagu daray oo lagu kobciyey farqadda kore ee 5aad,

Faqradda 6aad ee qodobkan waxaa la beddelay ereyga “Xukuumadda” laguna beddelay ereyada “Heerarka kala duwan ee Hay’adaha Dawladda” si aysan ugu ekaannin ama aysan u noqon Xukuumadda Federaalka midda keliya ay saaran tahay horumarinta arrimaha lagu sheegay qodobkan.

Nuxurka faqradda 7aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waa la tiray, nuxurkeeda waxaa lagu daray farqadda 5aad ee qodobkan, sidaas daraadeed looma baahna in gooni loo qoro sababtoo ah waxay noqonaysaa ku celin aan muhiim ahayn. Faqradda 7aad ee qodobka waxaa loo habeeyay loona qoray hab sharci ah iyadoo nuxurkeedii la faahfaahiyey, waaana la tiray “Arrimmahan laguma dabaqi karo dugsiyada ay leeyihiin dadka aan Muslimka ahayn”.

Faqradda 8aad ee qodobkaan waa cusubtahay, waxaa loo soo kordhiyey in la tilmaamo dowrka muhiimka ay ku leeyihiin dhalinyarada loona diyaariyo dhalinyarada

[59] https://www.ohchr.org/en/instruments-mechanisms/instruments/convention-rights-persons-disabilities .

Soomaaliyeed si u helaan waxbarasho tayo leh, xirafad iyo horumar. Faqradda 9aad ee qodobkan waa cusubtahay, waxayna xeerinaysaa ciyaaraha iyo horumarinta awoodda dhalinyarada iyo halabuurkooda.

### 3.22 Qodobka 29aad: Dhaqanka iyo Afka

Qodobka 29aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay afar (4) faqradood, si la mid ah asalka Dastuurka ahaa afar (4) faqradood. Faqradda 1aad waxaa la beddeley ereyga "dawladda" waxaana lagu beddeley "heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda", si aysan ugu ekaannin ama aysan u noqon Xukuumadda Federaalka midda keli ah oo u xilsaaran arrimaha lagu xeeriyey faqraddan. Sidoo kale, waxaa loo dhigay hab sharci oo aan nuxurka waxba ka beddelin, iyadoo lagu daray ereyga "xun iyo diinta".

Faqradda 2aad waxaa la beddeley ereyga "dawladda" laguna beddelay ereyada "hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh" si aysan ugu ekaannin ama aysan u noqon Xukuumadda Federaalka midda keli ah ay saaran tahay horumarinta arrimaha lagu sheegay qodobkan. Faqradda 3aad waxaa la beddeley ereyga "dawladda" waxaana lagu beddelay ereyada "hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh" si aysan ugu muuqan ama aysan u noqon Xukuumadda Federaalka midda keli ah oo ay saaran tahay horumarinta arrimaha lagu sheegay faqraddan. Nuxuurkii Faqradda 4aad ee asalka Dastuurka waa la tiray, sababtoo ah waxay si cad ugu xusan tahay mabaadii'da guud ee xuquuqda ee ku xusan Cutubkan. Faqradda 4aad ee wax-kabeddelka Dastuurka waa mid cusub oo la soo kordhiyey waxayna qeexaysaa in ay muhiim tahay in la dhiso hay'ad si gaar ah u horumarisa hiddaha dhaqanka iyo afka.

### 3.23 Qodobka 30aad: Xaqa Helidda Xogta

Qodobka 30aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay saddex (3) faqradood, si la mid ah asalka Dastuurka.

Faqradda 1aad waxaa lagu soo kordhiyay in heerkasta oo dawladeed uu bixiyo xogta ay hayaan "marka laga reebo xogta taabanaysa amniga qaranka ama xeerku reebayo"., taas macnaheedu waxaa weeye in uuna qofna xaq u lahayn in uu helo xog taabanaysa amniga qaranka oo heliddeeda qodobkan u cuskan karin. Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waa la tiray, sababta loo tiray waa ayada oo ku xadgudbaysa xuquuqda qof kale leeyahay, marka laga hadlayo xuquuqda aasaasiga ah oo qofku leeyahay, waxay ku egtahay meesha ay ka billaabato xuquuqda qofka kale.

Faqradda 2aad ee qodobkan waa mid cususb oo xeerinaysa in aan qof iyo hay'ad midna lagu qasbi karin bixinta xog amar maxkamadeed ama xeer la'aantiis, sababta farqaddan loo soo kordhiyey waxay tahay in laga hortago ku qasbid in qofku uu bixiyo xog uu hayo, ayadoo awood loo isticmaalayo ilaa iyo maxkamadi ku amarto ama xeer dhaqangal ah oo qasbaya bixinta xogtaas. Faqradda 3aad ee qodobka waxaa loo qoray hab qaanuuneed.

### 3.24 Qodobka 31aad: Xaqa Ilaalinta Xogta Shaqsiga

Qodobka 31aad ee soojeedinta wax-beddelka dastuurka waa qodob cusub oo la soo kordhiyey oo aan ku jirin asalka Dastuurka. Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka wuxuu u arkay muhiim qodob nidaaminaya xaqa ilaalinta xogta shaqsiga. Daraasad uu sameeyey GMDHD wuxuu gaaray natiijo ah in qodobkan lagu daro cutubka 2aad ee xuquuqda, maaddaama qodobka hore xeeriyey xaqa helidda xogta, ujeeddada qodobkan waa in uu xeeriyo ilaalinta xogtaas. Qodobkan cusub wuxuu ka kooban yahay afar (4) faqradood oo dhammaantood cusub oo la soo kordhiyey.

Faqradda 1aad ee qodobkan waxay tilmaamaysaa in qof kasta uu xaq u leeyahay xaqa ilaalinta xogta shaqsiga ah. Faqradda 2aad waxay xeerinaysaa in oggolanshaha qofku leh ama hab kale uu xeerku sheego in lagu isticmaali karo. Faqradda 3aad waxay qeexaysaa xaqa uu u leeyahay qofkasta in uu helo xogta isaga ku saabsan oo la aruuriyey iyo xaqa in la saxo. Faqradda 4aad waxay tilmaamaysaa in xeer gaar ah uu nidaaminayo xogta shaqsiga.

GMDHD wuxuu sameeyey daraasad ku saabsan Xaqa Ilaalinta Xogta Shaqsiga, guud ahaan, xaqa ilaalinta xogta ayaa waayadii hore waxaa loo arkayey in ay tahay qayb ka mid ah dhinaca xuquuqda dastuuriga ah ee loo yaqaan xaquuqda khusuusiyaadka ah "Pricacy", taas oo loola jeedo in lagu ilaaliyo danaha gaarka ah ee shakhsiyaadka iyadoo si gaar ah loo siinayo xuquuq ay ku xakameeyaan xogtooda gaarka ah iyo kuwa xasaasiga ah. Sidaa darteed, fikradda soo jireenka ah ee xaqa khusuusiyaadka ah waxay ilaalinaysaa xogta gaarka ah iyo kuwa xasaasiga ah iyada oo aan u oggolaan in si buuxda loo xakameeyo dadweynaha iyo macluumaadka guud ee shakhsiyaadka.

Habkani si tartiib tartiib ah ayuu isu beddelay 1970-meeyadii iyadoo xaqa khusuusiga ah oo loo arkay mid aan ku filnayn in uu wax ka qabto caqabadaha casriga ah ee waaweyn gaar ahaan xogaha danabaysan. Portugal waxay ay aheyd dalkii ugu horreeyey, iyadoo ku dartay xaqa ilaalinta xogta Dastuurkeeda 1976 kaas oo si weyn dib-u-eegis loogu sameyey 2005. Waaxaa timid baahi weyn oo loo qabo in la helo hannaan Dastuur iyo xeer oo lagu nidaaminayo xuquuqda iyo waajibaadka dadka xogtooda la ururiyo, sidoo kale, waajibaadka dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ee uruuriya xogta shakhsi ahaaneed. Dalalka qaar waxay dastuurkooda ku daraan qodobbo cad oo ku saabsan ilaalinta xogta halka kuwa kale bixiyaan ilaalinta xogta iyada, oo loo marayo xuquuqda dastuuriga ah ee khusuusiga ah, oo ay la socoto xeer gaar ah. GMDH wuxuu u arkay in ay muhiim tahay in lagu nidaaminayo xaqa ilaalinta xogta Dastuurka dib-u-eegistiisa, ayadoo lagu faahfaahinayo arrimaha kale ee la xiriira xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

### 3.25 Qodobka 32aad: Go'aanno Maamul oo Caddaalad ah

Qodobka 32aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay labo (2) faqradood, halkii asalka Dastuurku ahaa hal (1) faqrad. Faqradda 1aad ee qodobkan waxaa lagu sameeyey siiqeyn qaanuuni ah iyada oo aan nuxurka faqradda waxba laga

beddelin. Faqradda 2aad ee qodobkan waa mid cusub sababta loo soo kordhiyeyna waa si ay u qeexdo in qofka ku qanci waaya go'aan maamul inuu dacwad u gudbin karo maxkamadda awoodda u leh.

### 3.26 Qodobka 33aad: Xaqa Dacwadda iyo Isdifaaca

Qodobka 33aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay afar (4) faqradood, halka uu asalka Dastuurka ahaa shan (5) faqradood, maaddaama faqradda 4aad iyo 5aad la isku daray. Faqradda 1aad waxba lagama beddelin oo sideedii baa loo qaatay, waxayna xeerinaysaa in qof kasta u leeyahay xaqa uu dacwad xeerka waafaqsan uga furan karo maxkamadda awoodda u leh, tani waxay qayb mug leh ka tahay raadinta caddaaladda iyo sarreynta sharciga.

Faqradda 2aad ee qodobkan waxaa loo qoray hab qoraal sharci iyadoo aysan waxba ka beddelin nuxurka farqadda, waxaana la soo jeediyay in la tiro xarfaha (a) iyo (b). Waxaa kaloo la beddelay ereyga "waqti macquul ah" laguna beddeley "muddada ku xaddidan shuruucda", si ayna u noqon waqti furan. Faqradda 3aad ee qodobkan waxba lagama beddelin nuxurkeeda.

Waxaa la isku daray farqaddaha 4aad iyo 5aad ee asalka Dastuurka, maaddaama ay isku nuxur yihiin. Ereyada "Kaalmo Qaanuuneed" waxaa loo beddely "Gargaar sharci". Sida kor lagu soo xusay, faqradda 5aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waxaa lagu biiriyey faqradda 4aad ee isla qodobkan ee asalka Dastuurka, waxayna isla noqdeen faqradda 4aad ee qodobkan ee wax-kabeddelka dastuurka.

### 3.27 Qodobka 34aad: Xuquuqda Eedaysanaha

Qodobka 34aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa uu ka koobanyahay shan iyo tobon (15) faqradood halka asalkii Dastuurku uu ahaa saddex iyo toban (13) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan ereyga "barii' ah" waxaa lagu beddelay ereyada "qof aan dembi gelin", ujeeddaduna waa in eray-bixintu mideysnaato.
Faqradda 2aad nuxurkeeda waxba lamaga baddelin, halka faqradaha 3aad iyo 4aad ee qodobkan waxba lagama beddelin oo sidooda ayaa loo qaatay.

Faqradda 5aad waxa laga soo raray faqradda 9aad ee isla qodobkan, siiqadana wax baa laga beddelay. Faqradda 6aad ee qodobkan oo asalkii ahayd ee asalka Dastuurka oo hadda noqotay faqradda 5aad, sideedii ayaa loo qaatay waxna lagama beddelin.
Faqradda 7aad ee qodobkan waxaa laga soo raray faqradda siddeedaad ee qodobkan ee asalka Dastuurka, sideedii baa loo qaatay. Faqradda 8aad ee qodobkan oo ahayd faqradda 6aad ee asalka Dastuurka waxba lagama beddelin ee sideeda ayaa loo qaatay, heseyeeshaa ereyga "xukuumaddu" waxaa lagu beddelay "dawladdu". Faqradda 9aad ee qodobkan waxaa laga soo raray faqradda 10aad ee asalka Dastuurka, nuxurkeedana waxba lagama beddelin, oo sideedii baa loo qaatay. Faqradda 10aad ee qodobkan oo

ahayd faqradda 7aad ee asalka Dastuurka nuxurkeeda waxba laga beddelin, balse ereyga "qof kasta" waxaa lagu beddelay "eedeysanuhu".

Faqradda 11aad ee qodobkan waa mid cusub oo la soo kordhiyey, sababta faqradan loogu soo kordhiyay ayaa ah dhaqangelinta mab'da guud ee Qanuunka Ciqaabta kaasi ah "in aan qofna lagu ciqaabi karin laba jeer hal dambi". Qodobka 14aad, faqradda 7aad ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda "International Covenent on Civil and Political rights" ayaa isna reebaya in aan laba jeer hal dembi la isku ciqaabin, Soomaaliya qayb ayey ka tahay heshiiskaas[60]. Sidoo kale arrimaha uu xeerinayo qodobkan waxaa laga heli karaa heshiiskaas kor ku xusan.

Faqradda 12aad ee qodobkan ee Faqraddan waa isla faqradda 12aad ee asalka Dastuurka, ayadoo loo habeyey hab qanuuni ah. Faqradda 13aad ee qodobkan waa isla faqradda 13aad ee asalka Dastuurka. Faqradda 14aad ee qodobkan waa mid cususb oo la soo kordhiyey, sababtuna waa in dastuurka lagu adkeeyo xaqa racfaan qaadashada ee heerarka kala duwan ee maxkamadaha. Faqradda 15aad waxba lagama beddelin ee sideeedii ayaa loo qaatay.

### 3.28 Qodobka 35aad: Isucelinta Eedaysanayaasha iyo Dembiilayaasha

Qodobka 35aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay Afar (4) faqradood halka uu asalka Dastuurka ka ahaa laba (2) faqradood. Qodobkan wax-kabeddelka Dastuurka saddex faqradood oo cusub ayaa lagu soo kordhiyey.

Faqradda 1aad ee qodobkan waxba lagama beddelin oo sidii asalka ahayd ayaa la qaatay. Faqradda 2aad waa la tiray nuxurkeedana waxaa lagu daray faqradaha 1aad iyo 4aad ee isla qodobkan. Faqrooyinka 3aad, 4aad iyo 5aad waa la soo kordhiyey waxayna xeerinayaan in aan muwaaddin Soomaaliyeed loo gacangelin karin dal shisheey: Waxaa jira dalal badan oo sidaan oo kale ku xeeriyey dastuuradooda sida Germany[61]. Tan kale, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay diyaar u tahay in ay dalalka caalamka kala shaqayso iskaashiga sharciga si wadajir loola dagaallamo dembiyada xudduudaha ka tallaaba. Faqradda 5aad oo u dambaysa qodobkan waxay xeerinaysaa in Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya soo saarayo xeer nidaaminaya iskaashiga garsoorka guud ahaan, iyo gaar ahaan iskaashiga sharciga iyo isku gacangelinta eedeysanayaasha iyo dembiilayaasha. Waxaa jira heshiisyo caalami ah oo ay Soomaaliya qayb ka tahay sida UN Convention against Corruption oo dalalka qaybta ka ah oo ay Soomaaliya ka midka tahay siinaya fursad in ay eedaysanayaasha ama dambiilayaasha gacangelintooda warsadaan iyada oo aan heshiis gaar ah dalka ay khusayso la lahayn[62].

[60] https://www.ohchr.org/en/instruments-mechanisms/instruments/international-covenant-civil-and-political-rights
[61] Qodobka 16aad, Dastuurka Germany.
[62] https://www.unodc.org/documents/treaties/UNCAC/Publications/Convention/08-50026_E.pdf

### 3.29 Qodobka 36aad: Qaxootiga iyo Magangelyada

Qodobka 36aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobnayahay hal (1) faqrad, halka asalkii Dastuurku ahaa laba (2) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa loo habeeyey hab sharci ayadoo la kala saaray magangalyodoon iyo qaxootinimada. Soomaaliya waxay qayb ka tahay "Heshiiska Geneva ee 1951 iyo Protokoolkiisa 1967" oo waajibinaya arrimo badan oo khuseeya magangalyodoonka iyo qaxootiga[63]. Faqradda 2aad waa la tiray, Nuxurkeeda waxaa lagu daray cutubka 5aad ee nidaaminaya Asteynta Awoodaha gaar ahaan Qodobbada 53aad iyo 54aad ee asalka Dastuurka.

### 3.30 Qodobka 37aad: Xaddidaadda Xuquuqda

Qodobka 37aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay saddex (3) faqradood, halka asalkii Dastuurku ahaa shan (5) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan nuxurkeeda waa la beddelay, waxaana lagu soo kabay nuxurka faqradda 2aad ee qodobkan waxba lagama beddelin, waxayna xeerinaysa in xuuuqda iyo xorriyaadka cutubka labaad qorayo lagu xaddidi karo oo keliya xeer uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kaas oo aan bartilmaameedsanayn shaqsi ama koox gooni ah.

Faqradda 2aad ee qodobkan waa la tiray, nuxurkeeda waxaa lagu daray faqraddann 1aad ee isla qodobkan. Faqradda 3aad iyo 4aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waa la isku biiriyay, maaddaama ay labada faqradood ka wadahadlayaan arrimaha la siinayo tixgelinta marka ay go'aan laga gaarayo xadaynta xuquuqda iyo xoriyaadka ku xusan cutubkaan.

Farqadda 3aad ee soojeedinta wax-kabeddelka waa cusubtahay, waxayna xeerinaysaa in hay'adaha garsoorka ay leeyihiin mas'uuliyadda in ay damaanad qaadaan ilaalinta xuquuuqda, xoriyaadka iyo qiyamka uu xambaarsan yahay Dastuurka.

Faqradda 5aad ee qodobkan waxaa la soojeediyay in la tiro maaddaama ay dhici karto in la xaddido xuquuqda aasaasiga ah marka ay timaado xaalad degdeg ah taasoo ku xusan cutubka Amniga ka hadlaya.

### 3.31 Qodobka 38aad: Dib-u-xaqsooridda La Xiriirta Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha

Qodobka 38aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay lix (6) faqradood, halka uu asalka Dastuurka ka ahaa saddex (3) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn dhinaca siiqadda sharciga ah iyadoo nuxurkeeda aanan waxba laga beddelin, keliya la adkeeyay in xadgudubyada xuquuqda aadanaha loo gaysto ha ahaadaan kuwa dhacay, dhacaya ama mustaqbalka dhici kara in

[63] https://www.unhcr.org/sites/default/files/legacy-pdf/4ec262df9.pdf

maxkamad la horgeeyo si loogu sameeyo xaqsoor dhibbanayaasha, waxaa la tiray faqradda 2aad nuxurkeedana waxaa lagu daray faqradda 1aad ee qodobkan. Faqradda 2aad ee qodobkan waxba lagama beddelin oo sideedii baa loo qaatay.

Faqradda 3aad oo ah mid cusub waxaa loogu soo kordhiyey qodobkaan in uusan jirin waqti u xaddidan furidda oogiddda galdacwadeed gaboodfallada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha. GMDHD wuxuu diyaariyey daraasad dheer oo ku saabsan habka ugu habboon ee loogu nidaamiyo arrinta Dastuurada caalamka.

Faqradda 4aad waa cusubtahay, waxaana loo soo kordhiyey si loo qeexo in gabood fallada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha aan gabaad laga gali karin lana cafin karin. Faqradda 5aad waa mid cusub waxayna faraysaa in dawladda Soomaaliya ay qaado tallaabooyinka muhiimka ah ee ku aaddan arrimahan. Faqradda 6aad waa mid cusub waxaana lagama maarmaan ah in lahelo xeerar qeexaya magdhowga iyo xaqsoorka xad-gudubyada.

### 3.32 Qodobka 39aad: Fasiraadda Xuquuqda Asaasiga ah

Qodobka 39aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay saddex (3) faqradood, halka uu asalka Dastuurka ka ahaa afar (4) faqradood. Faqradda 1aad waxba lagama beddelin nuxurkeeda, waxaa lagu daray oo keliya ereyga “awoodda” iyo “aasaasiga”. Faqradda 2aad waxaa lagu sameeyay dib-u-habeyn si loo caddeeyo in haddii ay iska hor yimaadaan Dastuurka Soomaaliga uu mudnaanta ka yeelanayo qaanuunka dawliga ah ee shuruucda Soomaaliya ka mid ah. Faqradan 3aad waa la tirtiray, nuxurkeedana waxaa lagu daray faqradda 1aad ee qodobkan.

Faqradda 3aad ee qodobkaan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah iyadoo la tirtiray “xeer-dhaqameedka la jaanqaadi kara Shareecada iyo Dastuurka”, maaddaama xuquuqdaan Dastuurka ku xusan ay ka hormarayso xeer-dhaqameedka.

### 3.33 Qodobka 40aad: Guddiga Xuquuqda Aadanaha

Qodobka 40aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay saddex (3) faqradood, halka asalka Dastuurka ka ahaa laba (2) faqradood. Qodobkan waxaa loo soo raray nuxuurkii qodobka 111B, cutubka 10aad[64] Dastuurka, wuxuuna nidaaminaya Guddiyada Madaxabannaan oo Dastuurka ku jira.
Faqradda 1aad ee wax-kabeddelka Dastuurka waxay nidaaminaysaa awoodaha iyo waajibaadka Guddiga, waxaana halkan loo keenay in si fudud la iskugu xiro Guddiga iyo cutubkan oo xeerinaya axkaamta xuquuqda aadanaha.

Waxaa la tiray faqradda 2aad ee asalka Dastuurka, sababta loo tirayna waa in axkaamta ku saabsan Guddiga Xuquuqda Aadanaha lagu nidaaminayo cutubkan, awoodihiisa iyo

[64] GMDHD wuxuu farsamo ahaan qaatay in guddi kasta oo ku xusnaa cutubka 10aad lagu daro cutubka uu quseeyo, tusaale ahaan, Q.111 B oo xeerinaya Guddiga Xuquuqda aadanaha waxaa loo raray cutubka 2aad, halka qodobka 111E iyo 111G oo xeerinayey Guddiga Doorashooyinka in loo raro cutubka 4aad ee Matalaada Shacabka.

xilalkiisa waxaa lagu faahfaahiyey isla cutubkan. Faqradda 2aad waa mid cusub waxay nidaaminaysaa tirada xubnaha Guddiga iyo habraaca magacaabistooda. Faqradda 3aad waa la soo kordhiyey waxay tilmaamaysaa in uu BJFS uu soo saarayo xeer lagu faahfaahinayo arrimaha muhiimka u ah Guddiga.

## MADAXA SADDEXAAD: WAAJIBAADKA MUWAADDINKA

### 3.34 Qodobka 41aad: Waajibaadka Muwaaddinka

Qodobka 41aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay saddex (3) faqradood, halka uu asalka Dastuurka ka ahaa laba (2) faqradood. Faqradda 1aad sideeda ayaa loo qaatay.

Faqradda 2aad ee qodobkan waxaa la soojeediyay waxaa lagu sameeyey dib-u habeyn taxanaha xarfaha faqradda 2aad ay u qoran tahay.

Faqradda 2aad, Xarfaha "a, b, c, d, e," faqradda 2aad ee asalka dastuurka waxaa loo qaatay sideedii, halka lagu sameeyey toosin xarfaha "f, g, h, iyo i" ee faqradda 2aad asalka dastuurka.
xarafka (b) ee faqradda 1aad ee soojeedinta, waxaa kale oo lagu soo kordhiyey "ilaaliyana diinta, dalka, dadka iyo karaamada aadanaha".

Waxaa la soo kordhiyey xarfaha "e, j, k," oo faraya muwaaddin kasta barashada aasaasiyaadka diinta islaamka, ka ilaalinta deeganka wasakhda iyo dhawridda xuquuqda xayawaanka JFS.

Waxaa lagu daray faqradda 3aad ee isla qodobkan nuxurka "Ku-dhaqanka sinnaanta, xorriyaadka iyo xuquuqda lagama sooci karo waajibaadka. Sidaas darteed".

Faqradda 3aad ee soojeedinta waa mid cusub, sababaha uu GMDHD u soo kordhiyey ayaa ah in marka la fasirayo waajibaadyada faqradda 1aad ee qodobkan in aanan loo fasirin hab xaddidaysa xuquuqda iyo xoriyaadka asaasiga ah ee ku xusan cutubkan. Nuxurka faqraddan waxaa ka mid ah hordhacii faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka dastuurka.

### 3.35 Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 2aad

Cutubkan labaad waxaa inta badan qodobbadiisa lagu sameeyey siiqeyn iyo toosin, waxaana lagu soo kordhiyey labaatan iyo todoba (27) faqradood iyo 1 qodob oo cusub oo aan ku jirin asalka Dastuurka, waxaa la tirtiray 2 qodob iyo labaatan iyo seddex (23) faqradood oo ku jirtay asalkii Dastuurka KMG ah, waxaa toosin iyo siiqayn lagu sameeyey 31 qodob iyo 60 faqradood ee uu ka kooban yahay cutubkan, sida ku cad jaantuska soo socda:

**Jaantuska 2aad: Natiijada Wax-kabeddelka Cutubka 2aad**

Jaantuskan hoose wuxuu muuqalinayaa: (a) qodobbada iyo faqradaha la soo kordhiyey; (b) qodobbada iyo faqradaha la tiray; (c) qodobbada iyo farqadaha toosin iyo siiqayn lagu sameeyey; iyo (d) qodobbada ama faqradaha sidoodii loo qaatay.



## 4. Faallada iyo Sharaxaada Wax-kabeddelka Cutubka 3aad

### Cutubka 3aad: Dhulka, Hantida iyo Deegaanka

Cutubkan saddexaad wuxuu nidaaminaya dhulka, hantida iyo deegaanka, waxaa dhammaan qodobbadiisa lagu sameeyey toosin, waxaana lagu soo kordhiyey faqrado iyo qodobbo cusub oo aan ku jirin asalka Dastuurka, kuwaas oo xeerinaya arrimaha soo socda:

- Dhismaha Guddiga Qaranka Dhulka, waajibaadkiisa, xubnihiisa & shuruudaha;
- Axkmaamta la xiriirta dhulka qofka aan muwaaddinka aheyn ee uu u adeegsan karo, cidda awoodda u leh bixiintiisa, iyo xayndaabka sharci;
- Aasaasidda wakaaladaha u xilsaaran maaraynta milkiyadda iyo in kheyraadka dabiiciga ah looga faa'iidaysto si caddaalad ah;
- Guddiga u xilsaaran abaabulka iyo dardargelinta uruurinta dakhliga;
- Mas'uuliyadda heer federal iyo heer dawlad goboleed ee ka saaran deegaanka sida ilaalinta iyo dhowrista deegaanka, sidii dalku u noqon lahaa mid doogeysan, wacyigelinta bulshada, ilaalinta isir-hayeenka iyo nafleyda.

GMDHD wuxuu daraasad ku sameeyey Heshiiskii Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Dalka (Shidaalka iyo Macdanta) ee Golaha Wadatashiga Qaran uu ku gaaray magaalada Baydhabo bishii Juun 2018. Heshiiskan waxaa saxiiixay Ra'iisal Wasaaraha XFS, madaxda dawlad goboleedyada Puntland, Jubbaland, Koonfur Galbeed, Galmudug iyo Hirshabeelle iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir. Heshiiskaas wuxuu ka koobnaa 6 qodob iyo laba jadwal.

GMDHD wuxuu heshiiska ku sameeyey falanqeyn, asagoo u qaybiyey laba qaybood:

- Qayb lagu darayo dib-u-eegista Dastuurka JFS, gaar ahaan cutubkan nidaaminayaa dhulka, hantida iyo deegaanka, iyo sidoo kale cutubka nidaaminaya federaalaynta maaliyadda.
- Qayb kale oo lagu soo saarayo xeerar dhowr ah oo uu sameeyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, sida Sharci Lr.19 Batroolka JFS oo ka mid ah qaybtan, oo uu BFS soo saaray 2020[65].

Heshiiskii Baydhaba ee Juun 2018 wuxuu jideeyey dhowr mabda' oo wadaagga kheyraadka ku saabsan ay ka mid yihiin:

- In tixgelin la siiyo baahiyaha kala duwan ee gobollada haysa kheyradka dabiiciga ah iyo kuwa aan haysan. Tan oo laga fahmayo in dawlad goboleedyada soo saara kheyraada ay helayaan qoondo gaar ah ee dakhliga kheyraadka dabiiciga ah cawlcelin ahaan dhibtii ka dhalatay soo saaridda awgeed.
- In la xaqiijiyo in adeegyada asaasiga ah loo bixiyo si cadaalad ah. Mabd'an waxaa laga fahmayaa, walow tixgelin la siinayo baahiyaha kala duwan ee gobollada soo saara iyo gobollada aan soo saarin kheyraadka, haddana in kala duwanaashaha

[65] Sharci Lr. 19 , Sharciga Batroolka ee Disembar 2020

guud ee dhaqaalaha dawlad goboleedyada uu ahaado mid dhextaal u noqda wadaagga kheyraadka.

- In lagu baraagugsanaado in wadaagga kheyraadka dabiiciga ah lagu saleeyo baahiyaha mustaqbal ee dalka. Mabda'an waxaa asna laga fahmayaa doonista in la keydiyo qeyb dakhliga ka mid oo la abuuro sanduuq maalgelin ee jiilasha mustaqbalka.

Waxaa xusid mudan in GWQ uu heshiis[66] ka gaaray federaalaynta maaliyadda, waxaana heshiiska lagu nidaaminayaa cutubka federaalaynta maaliyadda.

### 4.1 Qodobka 42aad: Dhulka

Qodobka 42aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay siddeed (8) faqradood, halka asalka Dastuurka ka koobnaa shan (5) faqradood.

Faqradda 1aad ee qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyey, sababta loogu soo kordhiyey ayaa ah si loo xaqiijiyo mabda'a ah in dhulka uu leeyahay shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Faqradda 2aad ee qodobkan waxba lagama beddelin oo sideedii ayaa loo qaatay.

Faqradda 3aad ee qodobkan waxay xeerinaysaa sifada dhulka lagu haysan karo, lagu sheegan karo, laguna isticmaali karo, oo ah mid waafaqsan xeerarka dalka. Farqadda 4aad ee qodobkan waxay xeerinaysaa sida dhulka guud ahaan loo isticmaalayo, loona maamulayo iyada oo lagu daray erey bixinno sii faah-faahinaya.

Faqradda 5aad nuxurkeeda waxba lagama baddelin, waxaa la soo kordhiyey xarafka(a) "Dhooraarinta iyo ilaalinta bey'adaha u nugul waxyeellada saameeya isu dheellitirnaanta xiriirka bey'adeed[67] iyo meelaha kale oo ay ku jirto danta guud". Hase ahaate xarafka (g) ee faqraddan waxaa laga dhigay faqrad gooni ah oo ah tan 6aad, maaddaama ay ka hadlayso awoodda dawlad goboleeyada ay u leeyihiin dejinta siyaasadda dhulka ee heerkooda ah. Sidoo kale waxaa la soo jeediyay in la isku daro qaar ka mid ah farqaddaha si loo helo qaab urursan oo isku xiran maangalna ah. Kalmadda "si looga hortago ku-takrifalidda" waxaa lagu beddelay "si loo ilaaliyo".

Faqradda 6aad oo qodobkan waxaa laga soo raray xarafka "g" ee faqradda 4aad ee qodobkan, waxaana lagu daray "aan ka hor imaanayn siyaasadda qaran ee dhulka iyo xeerarka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya".

---

[66] Heshiiska Federaalaynta Maaliyada (Astaynta iyo Wadaagga Dakhliga) oo GWQ ku gaaray, 1-17 Maarso,2023, magaalada Baydhabo, Koonfur Galbeed, Soomaaliya.

[67] Xiriirka Deegaaneed (Bey'adeed): waa isudheellitirnaata xiriirka ay nafleyda midba midda kale la leedahay iyo degaanka ay ku nool yihiin oo hareeriya. (Ecolojical) Tusaale: wasakhda lagu daadiyo badweynta wuxuu halis Culus ku yahay inuu wax weyn u dhimo xiriirka isu dheellitirnaanta deegaaneed (bey'adeed)

Faqradda 7aad nuxurkeeda waxba lagama baddelin, hase yeeshee, waxaa lagu sameeeyey toosin. Faqradda 8aad ee qodobkan waa mid cusub waxayna nidaaminaysaa dhulka qofka aan muwaaddinka aheyn uu adeegsan karo, cidda awoodda u leh bixintiisa, iyo xayndaabka sharci.

Faqradda 5aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waxaa loo arkay in ay tahay mid ku celis ah, tilmaamaysana awood xukuumaddu horay u lahayd.

**Daraasad ku saabsan Dhulka**
Marka laga hadlayo dhul waa hanti maguurta ah, wadammada soo korayana u ah saldhigga ugu muhiimsan ee kheyraadka gaar ahaan miyiga, sidoo kale waxaa lagu tiriyaa inuu yahay go'aaminta ugu weyn ee nolosha dadka. Sidaa darteed, mowduuca muhiimka ah ee cilmi-baaristan waa in la qiimeeyo saameynta dhulka uu ku leeyahay nolasha bulshada, wax soo saarka iyo horumarinta kheyraadka dhulka lahaanshiyaha iyo helitaanka dhul dhammaan bulshada u simantahay iyo kheyraadka dabiiciga ah ee dhulka ku jira.

Waxaan halkaan hoose ku soo qaadanaynaa arrimaha muhiimka ah ee uu nidaamiyo dastuurka ayna tahay in lagu qeexo arrimaha la xiriira dhulka iyo kheyraadka dabiiciga ah waxaana ku falanqeyn doonaa arrimahaan soo socda:

- Siyaasadda iyo Sharciyadda Dhulka.
- Lahaanshaha Dhulka.
- Maamulka iyo Maareynta Dhulka.

**Siyaasadda iyo Xeerka Dhulka**
Dhulka, hantida, kheyraadka iyo deegaanka waxaa lagu nidaamiyaa Dastuurka si mabaadi' guud ah, waxaana lagu faahfaahiyaa xeerar kale. Barlamaanka ayaa loo igmaday inuu ka soo saaro xeerar nidaamiya qeexaya hab maamulka dhulka iyo sida bulshada loogu qaybiyo si siman oo caddaalad ah, ilaaliyana dhulka danta guud. Shacabka lahaashahiisa dhulka ka sokow dib-uhabayntiisa iyo nidaamnintiisa waa mas'uuliyad dawladu leedahay.

Sidaa awgeed, marka hore waa in la dajiyaa barnaamijka siyaasadda guud ee dhulka si ay u caddaato qoondaynta, maamulka, lahaanshaha iyo xuquuqda isticmaalka dhulka. Sidoo kale siyaasadaha isticmaalka dhulka waa cabbir muhiim ah oo lagu hormarinayo bulshada dhulkaa dagan iyo lahaanshiyahiisa.

Waxaa jira isticmaalka dhulka habab sharci ee kala duwan oo lagu maamulo arrimaha dhulka, Dastuurka KMG wuxuu tilmaamay mabaadii' guud "dhulka, badda, hawada iyo kheyraadka dabiiciga ah" hanti qaran oo ay shacabka Soomaaliyeed wada leeyihiin, waxaana masuul ka ah Dawladda Federaalka[68].

[68] Qodobbada 7 ee Dastuurka KMG 2012.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira caqabado baahsan oo la xiriira nidaam siyaasadeedka dhulka Soomaaliya, marka laga soo tago caqabadaha hirgelinta sharci ee heerarka kala duwan ee dowladda. Saa darteed waa in la helaa siyaasad iyo qorshe dhul oo dhammaystiran, waxayna u baahantahay in dib-u-habeyn lagu sameeyo dhammaan sharciyada dhulka heerarka kala duwan ee dawladda.

**Lahaanshaha Dhulka**

Marka laga eego dhulka sharciyan yaa leh ma dawladdaa leh mise shacabka? Dastuuradu inta badan kuma kala aragti duwan, balse siyaaba kala duwan ayay u tilmaameen. Waxaan soo qaadan doonaa ilaa dhowr waddan dastuuradooda:

1) Dastuurka Kenya[69]: wuxuu tilmaamay in dhammaan dhulka Kenya leeyahay shacabka Kenya si wadajir ah qaran ahaan, bulsho ahaan iyo shaqsi ahaanba.

2) Dastuurka Uganda[70]: Dhulka Uganda waxaa iska leh muwaaddiniinta Uganda, waxaana lagu siin doonaan si waafaqsan nidaamka dhuleed ee ku xusan dastuurkan. Dawladda ama Dawladda Hoose, waxay yeelan karaan dhul dan guud ah. "Xukuumadda ama dawladda hoose waa inay shacabka u ilaaliyaan dhulka danta guud sida harooyinka dabiiciga ah, webiyada, dhirta qoyan, kaydka kaynta, seeraha ugaadha, seerayaasha qaranka iyo dhul kasta oo loo qoondeeyay arrimo deegaan iyo dalxiis lana xiriirta danta guud ee muwaaddiniinta oo dhan.

3) Dastuurka Itoobiya[71]: Waxaa uu qeexayaa xuquuqda hantida iyo lahaanshaha dhulka miyiga iyo magaalada, dhulka beeralayda, dhulka xoolo dhaqatada iyo sidoo kale dhammaan kheyraadka dabiiciga ah waxaa si gaar ah u leh dawladda iyo shucuubta, qoomiyadaha itoobiya, lama iibin karo ama wax kale laguma bedealan karo, waxaana nidaamin doono sharci gaar ah.

4) Dastuurka KMG[72]: wuxuu tilmaamayaa in uu yahay dhulka iyo kheyraadka dabiiciga ah hanti qaran oo ay shacabka Soomaaliyeed wada leeyihiin, waxaana mas'uul ka ah Dawladda Federalka.

Sidaas darteed, dhulku waa hanti guud oo ka dhexeeya ummadda, mas'uuliyadda nidaaminta iyo maamulka dawladda ayaa leh. Sidoo kale qoondaynta iyo qaybinta dhulku waxay muhiim u tahay horumarka dalka iyo dimuqraadiyaynta waxayna lagama maarmaan u tahay yaraynta saboolnimada, ilaalinta dhul beereedka, keeymaha, deegaanka iyo dhulka danta guud.

[69] Qodobada. 60 – 72 ee Dastuurka Kenya 2010.
[70] Qodobada. 237-245 ee Dastuurka Uganda 2017.
[71] Qodobka.40 ee Dastuurka Itoobiya 1994.
[72] Qodobka.43 ee Dastuurka KMG 2012.

Marka laga reebo dhulka danta guud oo ay dawladda dhexe ama dawladaha xubnaha ka ah ay leyihiin awoodda bixinta dhulka danta guud iyadoo la raacayay shuruucda nidaamiya, waxaana nidaamiya isticmaalka dhulka iyo lahaashahiisa xeerar gaar ah. Sidoo kale qaabeynta dhulku waxay la mid tahay dib-u-habaynta siyaasada dhulka, sababtoo ah waxay diiradda saaraysaa wax-kabeddelka sharciyada lahaanshaha dhulka.

### 4.2 Qodobka 43aad: Guddiga Qaranka Madaxbannaan ee Dhulka

Qodobka 43aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa qodob cusub, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood.

Faqradda 1aad ee qodobka waxaa lagu xeeriyey dhismaha Guddiga oo xeer BFS lagu dhisayo. Faqradda 2aad ee qodobkan waxay nidaaminaysaa xilalka iyo waajibaadka Guddiga Qaran ee Dhulka. Faqradda 3aad waxay faraysaa dhammaan hay'adaha dawladda heer kasta in ay Guddiga Madaxbannaan gacan ku siiyaan xilgudashadiisa waana in ay ilaaliyaan madaxbannanidiisa, dhex-dhexaadnimadiisa, xurmada dhowrsanaantiisa iyo waxtarkiisa.

| |
|---|
| GMDHD sameeyey daraasad hordhac ah waxaana la go'aamiyey in lagu xuso cutubka 9aad daraasad la xiriirta hay'adda u xilsaaran sida gaar ah sida maxkamada ama guddi u gaar ah arrimaha xallinta Khilaafaadka Dhulka. |

**Maamulka iyo Maareynta Dhulka.**

Soomaaliya kama jirto hay'ad ama guddi maamula arrimaha dhulka (komishanka dhulka) oo awood u leh nidaaminta, maamulka iyo xalinta khilaafaadka dhulka, waxaana u qaabilsan dawladaha hoose oo awood gaar ah loo siiyay inay maamulaan dhulka sida[73]. Halka Dastuurka Uganda[74] uu jideeyay in la sameeyo guddi maamula arrimaha dhulka (komishanka dhulka) islamarkaana uu qeexay inta xubnood ay noqonayaan, muddada ay xilka haynayaan, sida ay xilka ku imaanayaa iyo sida ay xilka ku waynayaan, sidoo kale wuxuu tilmaamay in la helaa maxkamad dhuleed oo dhageysata muranka dhulka, waana in uu jiraa xeer la yiraahdo Xeerka Dhulka. Halka Dastuurka Kenya[75] uu u qaybiyay dhulka mid guud, mid bulsho ama mid gaar ah, waxaana loo maamuli si siman, hufan, wax soo saar leh oo waafaqsan mabaadii'da Dastuurka waxaana maamulaya Guddiga Qaranka ee Dhulka.

Dadka Soomaaliyeed waxa ay ku nool yihiin magaalooyinka waaweyn iyo degmooyin tuulooyin yaryar oo baadiyaha ah iyo reerguuraga ah, ruqsadaha dhulka waxaa bixiya dawladaha hoose iyagoo maamulaya dhammaan dhulka noocyadiisa, lahaanshiyaha dhulka dawladda leedahay ama danguud ah laguma caddeyn Dastuurka. Sidoo kale guddi qaran ama hay'ad gaar ah oo maamusha dhulka, marka laga yimaado qeexitaanka

[73] Sharci Lr 10 1980 iyo sharci Lr.61 1981 shariga fulinka dhulka dhisma dalka JDS.
[74] Qodobada. 238, 239 ee Dastuurka Uganda 2017
[75] Qodobka. 67 ee Dastuurka Kenya 2010.

Dastuurka si guud iyo in dawladda si qasab ah hanti ula wareegi karto danguud awgeed, qof kasta oo lagala wareego hanti wuxuu dawladda xaq ugu leeyahay magdhaw caaddil ah[76]. Saa darteed Dastuurka wuxuu ka baaqsaday dhulka dawladda ee danta guud iyo sida loo maamulayo, loo isticmaalayo ama loo bixinayo. Dawladda hoose awood u leedahay maamulka iyo bixinta dhulka, balse wixii dhul danguud ah maamulkiisa iyo bixintiisaba shaqo kuma laha dawladaha hoose. Haddaba maaddaama dalku federaal yahay dib-u-eegista Dastuurkana marayo heer gabagabo ah waxaa muhiim ah in lagu qeexo Dastuurka cidda awoodda maamul iyo ilaalinta dhulka leh heerarka dawladda, iyadoo la raacaya nidaamka federaalka, si loo helo caddaalad iyo horumar bulsho.

GMDHD wuxuu soojeediyey in la dhiso guddi madaxbannaan ee dhulka oo lagu qeexay awoodihiisa iyo xilkiisa shaqo Dastuurka.

**4.3 Qodobka 44aad: Xubnaha Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka**

Qodobka 44aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo xeerinaya xubnaha Guddiga Qaran oo Madaxabannaan ee Dhulka waa qodob cusub oo la soo kordhiyey.

**4.4 Qodobka 45aad: Shuruudaha Xubinnimada Guddiga**

Qodobka 45aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo ah mid cusub wuxuu xeerinayaa shuruudaha xubinnimada Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka oo lagu dhisay qodobka 43aad ee cutubka 3aad ee wax-kabeddelka Dastuurka. Qodobkan wuxuu ka kooban yahay laba (2) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan waxay xeerinaysaa shuruudaha laga rabo xubnaha Guddiga. Faqradda 2aad ee qodobkan waxay nidaaminaysaa habka xubnaha Guddiga loo magacaabayo oo ah in Golaha Wasiirradu soo jeediyaan iyaga oo la tashanaya hay'adaha ay khuseyso ee heerarka kala duwan. Kaddibna Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu ku meelmariyo Xeer Madaxweyne.

**4.5 Qodobka 46aad: Kheyraadka Dabiiciga**

Qodobka 46aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay saddex (3) faqradood, halka asalkii Dastuurku ahaa hal (1) faqrad. Faqradda 1aad ee qodobkan waxaa lagu sameeyey dib-u-habayn iyadoo si cad loo muujiyey in kheyraadka dabiiciga uu yahay hanti qaran loona isticmaalayo qaab waara una dhexeeya kana faa'idaystaan dhammaan shacabka. Faqradda 2aad ee qodobkan waa mid cusub oo hadda la soo kordhiyey. Heshiikii Baydhabo ee 2018 wuxuu abuuray hay'adaha kala duwan oo maamulayo Batroolka sida: (a) Golaha Kheyraadka Dalka, (b) Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS); (c) Shirkadda Shidaalka Soomaaliyeed (SONOC); iyo (d) Hay'ado kale ee heer dawlad goboleed.

---

[76] Qodobka. 26 ee Dastuurka KMG 2012.

Ujeeddada faqraddan loogu soo kordhiyey waa in la caddeeyo wakaaladaha la dhisayo ee u xilsaaran maaraynta milkiyadda iyo in kheyraadka dabiiciga ah looga faa'iidaysto si caddaalad ah.

Faqradda 3aad ee qodobkan waa mid cusub oo la soo kordhiyey. Heshiiska[77] Federaalaynta Maaliyadd ay GWQ uu ku gaaray magaalada Baydhabo 2023, ayaa lagu go'aamiyey in la dhiso guddi u xilsaaran abaabulka iyo dardargelinta uruurinta dakhliga, maaddaama heshiis siyaasadeed la gaaray, farqadda 3aad waxay faraysaa dhismaha Guddiga Abaabulka iyo Dardargelinta Uruurinta Dakhliga, sidoo kale, faqradda 3aad waxay faraysaa in si caddaalad ah ay u wadaagaan kheyraadka dabiiciga ah heerarka kala duwan ee Dawlada Federaalka Soomaaliya.

**4.6 Qodobka 47aad: Deegaanka**

Qodobka 47aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxa u ka koobanyahay shan (5) faqradood, halka asalka Dastuurka ahaa afar (4) faqradood. Faqradda 1aad ee qodobkan, ereyada "Xukuumadda Federaalka" waxaa lagu beddeley ereyada "hay'adaha awoodda u leh ee heerarka kala duwan ee Dowladda" taasoo lagu muujinayo in ay mas'uuliyad ka saaran tahay dhammaan hay'adaha kala duwan ee dawladda dhowrista iyo ilaalinta bii'adda. Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka Dastuurka waxba lagama beddelin ee sideeda ayaa loo qaatay. Faqradda 3aad waa mid cusub oo la soo kordhiyey waxay qeexaysa mas'uuliyadda dawladaha heer federal iyo heer dawlad goboleed ee ka saaran deegaanka sida:

- ilaalinta iyo dhowrista deegaanka,
- sidii dalku u noqon lahaa mid doogeysan,
- wacyigelinta bulshada,
- ilaalinta isir-hayeenka iyo nafleyda,
- dejinta nidaamyo qiimeeya ilaa heerka ay gaarsiisantahay saameeynta waxyeellada deegaanka iyo u kuurgalka xaaladaha degaanka,
- ciribtirka waxyaabaha deegaanka halis ku ah,
- qaadista tallaabooyinka lagama-maarmaanka u ah dib-u-noolaynta, dib-u-dhiraynta, kor-u-qaadidda, ilaalinta deegaanka,
- ka hortagidda waxyeellada saamayn kara ama sababi kara isbeddelka cimilada.

Faqradda 4aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin ee waxaa lagu sameeyey siiqo toosin. Faqradda 5aad ee wax-kabeddelka Dastuurka nuxurkeeda waxba lagama beddelin ee waa la toosiyey oo la koobay, faqraddan waxay tilmaamaysaa in BFS uu soo saaro xeer ku saabsan deegaanka oo qeexaya mabaadii' guud iyo halbeegyo lagu ilaalinaayo deegaankaa si loo damaanad qaado in dhammaan Jamhuuriyadda loo ilaaliyo si isku mid ah.

[77] Qaybta 6(2) ee Heshiiska Federaalaynta Maaliyadda, 17/03/2023, Baydhabo.

### 4.7 Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 3aad

Cutubka saddexaad waxaa intiisa badan qodobbada lagu sameeyey toosin, waxaana lagu soo kordhiyey 13 faqradood iyo 3 Qodob oo cusub oo aan ku jirin asalka, sidoo kale, waxaa lagu daray Heshiiskii Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Dalka (Shidaalka iyo Macdanta) ee Golaha Wadatashiga Qaran uu ku gaaray magaalada Baydhabo bishii Juun 2018. Waxaa toosin iyo siiqayn lagu sameeyey 9 faqradood.

**Jaantuska 3aad: Natiijada Wax-kabeddelka Cutubka 3aad**

Jaantuskan hoose wuxuu muuqalinayaa: (a) qodobbada iyo faqradaha la soo kordhiyey; (b) qodobbada iyo faqradaha la tiray; (c) qodobbada iyo farqadaha toosin iyo siiqayn lagu sameeyey; iyo (d) qodobbada ama faqradaha sidoodii loo qaatay.

## JAANTUSKA 3AAD



## 5. Faallada iyo Sharaxaada Wax-kabeddelka Cutubka 4aad

### Cutubka Afaraad: Matalaadda Shacabka

Cutubkan wuxuu nidaaminayaa doorashooyinka wuxuuna ku dhisan yahay heshiiskii dooraashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ) ee Maajo 2023. GMDHD wuxuu ku sameeyey falanqayn dhammaystiran heshiiska hannaanka doorashooyinka JFS ee uu gaaray Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ), iyadoo laga duulayo heshiiska GWQ iyo daraasado badan uu Guddiga ka sameeyey axkaamta la xiriirta qodobbada heshiiska doorashooyinka, GMDHD wuxuu diyaariyey cutubkan 4aad oo ka kooban 14 qodob oo kulligood ay wada cusub yihiin marka laga reebo hal qodob.

**Lafaguridda iyo Falanqeynta Heshiiska Hannaanka Doorashooyinka JFS**

### 5.1 Qodobbada Heshiiska

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgalinta Dastuurka wuxuu ku sameeyey falanqeyn iyo lafagurid heshiiska hannaanka doorashooyinka JFS ee uu ku gaaray Golaha Wadatashiga Qaran Maajo 2023, magaalada Baydhabo, ayna saxiixeen Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Ku-xigeenkiisa, madaxweynayaasha Jubbaland, Koonfur Galbeed, Galmudug iyo Hirshabeelle iyo sidoo kale Guddoomiyaha Gobolka Banaadir. Heshiiskaas wuxuu ka koobanyahay 12 qodob oo xeerinaya arrimaha kala ah:

- Hannaanka iyo deegaan doorashada JFS;
- Habka doorashooyinka goleyaasha iyo heerarka kala duwan ee JFS;
- Midaynta doorashooyinka heerarka federaalka, DXDF iyo dawlahada hoose;
- Xisbiyada siyasaadeed;
- Maamulka doorashooyinka;
- Arrimo khaas oo si gaar ah u baahan heshiis kale ay uga gaaraan.


### 5.2 Saamaynta Heshiiska uu ku yeeshay Cutubyada Dastuurka

Heshiiskani wuxuu saamayn ku yeeshay cutubyo iyo qodobbo badan oo ka tirsan Dastuurka asalka, waxaa ka mid ah lixda cutub ee soo socota

1) Cutubka 4aad, gaar ahaan qodobka 47aad.
2) Cutubka 6aad, gaar ahaan qodobbada 60aad, 63aad, 64aad, 71aad iyo 72aad.
3) Cutubka 7aad.
4) Cutubka 8aad.
5) Cutubka 10aad.
6) Cutubka 12aad.

### 5.3 Qaybaha Heshiiska

GMDHD wuxuu qodobbada heshiiska doorashooyinka u kala qaybiyey saddex qaybood oo kala ah.




**Qaybta 1aad: Qodobbo ka mid noqonaya dib-u-eegista Dastuurka**

Isagoo ka duulaya hannaanka Dastuur qorista caalamiga ah iyo isbarbardhig uu ku sameeyey dastuurada dalal badan oo caalamka ka mid ah oo ku aaddan sida doorashooyinka loogu nidaaminayo iyo qodobbada lagu daro dastuurada, GMDHD wuxuu go'aamiyey in arrimaha soo socda lagu daro dib-u-eegista Dastuurka:

- Mabaa'diida aasaasiga ah.
- Hannaanka doorashada.
- Midaynta doorashooyinka.
- Xisbiyada.
- Doorashooyinka hay'adaha iyo xafiisyada kala ah Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka JFS, Hoggamiyaha iyo Hogaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleed kasta, Golaha Shacabka, Golaha Aqalka Sare, Golaha Wakiilada iyo Dawladaha Hoose.
- Maamulka Doorashooyinka.

**Qaybta 2aad: Qodobbo noqonaya Xeerarka**

Iyadoo laga duulayo qodobbada guud ee lagu nidaamiyey Dastuurka, waxaa lagama maarmaan ah in la helo xeerar faahfaahinaya qodobbada lagu nidaamiyey Dastuurka. Guddigu wuxuu u arkaa in ay tahay muhiim in la curiyo xeerarka qaar ka mid halka kuwa kale loogu baahan yahay wax-kabeddelka shuruucdii jirtay, GMDHD wuxuu garowsanyahay baahida weyn ee looqabo xeerarkaas, asagoo ka duulaya qodobka 134aad ee Dastuurka iyo jadwalka (C) iyo (D) ee faraya curinta iyo wax-kabeddelka xeerarka doorashooyinka oo ay ka mid yihiin:

- Xeerka lagu dhisayo Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka iyo Soohdimaha(wax-kabeddel);
- Xeerka lagu nidaaminayo doorashooyinka dhammaan heerarka kala duwan ee dawladda; iyo
- Xeerka Xisbiyada Siyaasadda (wax-kabeddel).

**Qaybta 3aad: Siyaasado iyo Heshiisyo**

Heshiiska waxaa ka mid ah qayb aan ka mid noqoneyn dib-u-eegista Dastuurka oo Guddiga loo igmaday in uu ka shaqeeyo, waxaan ka mid ah:

- Taariikhda loo xaddiday qabashada doorashooyinka.
- Heshiiska siyaasadeed ee la xiriira qoondada haweenka.
- Arrimaha la xiriira kuraasta Aqalka Sare ee Somaliland iyo Gobolka Banaadir.

## MADAXA KOOWAAD: MABAADI'DA GUUD EE MATALAADDA SHACABKA

### 5.4 Qodobka 48aad: Awoodda Shacabka

Qodobka 48aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay afar (4) faqradood, halka asalkii Dastuurka ahaa saddex (3) faqradood. Nuxurka faqradda 1aad ee qodobkan oo ku saabsan awoodda isxukunka shacabka waxba lagama beddelin ee waxaa lagu sameeyey dib-u-habayn yar. Faqradda 2aad ee qodobkan waxaa lagu sameeyey toosin iyo siiqayn iyadoo matalaadda heerarka kala duwan ee dawladdeed ay noqoto mid furan oo loo dhan yahay, muwaaddinkana uu ka qeyb geli karo si toos ah iyo si dadban. Faqradda 3aad ee qodobkan waxba lagama baddelin nuxurkeedii, waa la soo koobay oo keliya.

Faqradda 4aad ee qodobkan waa mid cusub waxayna xeerinaysana mas'uuliyadda dawladda federaalka ah ee ku aaddan in dawlad goboleed kasta ay ka dhaqangasho nidaam dimuqraadi ah oo waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka, sababaha faqradda cusub loogu soo kordhiyay qodobkan ayaa ah in la xaqiijiyo u hoggaansanaanta mabaadii'da asaasiga ah ee ku saabsan matalaadda shacabka ee heerarka dawladeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### 5.5 Nidaamka Doorashooyinka iyo Xisbiyada

Qodobka 47aad ee asalka Dastuurka waa la tiray, xuxurkiisa oo faahfaahsan waxaa lagu sheegay qodobbada kale ee cutubkan 4aad.

## MADAXA LABAAD: DOORASHOOYINKA

### 5.6 Qodobka 49aad: Mabaadi'da Guud ee Doorashooyinka

Qodobka 49aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa qodob cusub oo la soo kordhiyey. Qodobkaan waxaa u nidaaminayaa mabaadi'da guud ee doorashooyinka hagaya, waxaana laga soo qaatay nuxurka heshiiskii Doorashooyinka ee uu gaaray Golaha Wadatashiga Qaran 27 Maajo 2023[78]. Mabaadi'da ku xusan heshiiska waa lix faqraddood, waxaana loo rogay faqradahaas siiqo qaanuuni ah. Mabaadi'dan waxay saldhig u yihiin nidaamka doorashooyinka oo muhiim tahay in uu yahay mid:

1) Xor ah, caaddil ah, codkuna qarsoodi yahay, oo ka maran takoor, eex, musuqmaasuq, cabsigelin iyo hanjabaad, marin habaabin iyo faragelin shisheeye;
2) Dammaanadqaada xuquuqda siyaasadeed ee muwaaddinka ku xusan qodobka 21aad ee Dastuurka;
3) Sugaya geeddisocodka doorashada, oo si sahlan loo fahmi karo xeerarkiisa, qaababkiisa iyo habraacyadiisaba, uuna fulinayo Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha;
4) Dammaanad qaadaya in dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo ay leeyihiin xaqa dhiibashada codkooda si siman;
5) Sharci ku salaysan, geeddisocodkiisuna loo maareeyey, loona korjoogteeyey si madaxbannaan oo sugaya hab daahfuran oo isla xisaabtan leh;
6) Sugaya in bulshada Soomaaliyeed ay helaan matalaad caaddil ah, siiba beelaha laga tirada badan yahay;
7) Xaqiijinaya in aan lagu xad gudubin midnimada Jumhuuriyada iyo bulshada Soomaaliya;
8) Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha iyo kooxaha kala duwan ee Soomaaliyeed ay helaan matalaad caadil ah, siiba haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh;
9) Dhiirigelinaya nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan, islamarkaana tixgalinayana xaaladda amni iyo tan dhaqan dhaqaale ee Jamhuuriyadda; iyo
10) Ka hortaga hurinta colaadaha.

### 5.7 Qodobka 50aad: Nidaamka Doorashooyinka

Qodobka 50aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa mid cusub, wuxuuna qeexayaa hannaanka doorashooyinku in salaysan qof iyo cod, xeer uu soo saaro Baarlamaanka ayaa qeexaya hannaanka doorasho matalaadda isu-dheelitiran ee liiska xiran (Proportional Representation - Closed List) oo ah hal deegan doorasho ee ku

[78] Ararta Heshiiska Golaha Wadatashiga Qaran, May-2023

xusan nuxurka heshiiskii GWQ[79], oo lagu heshiiyey nidaamka matalaadda isu-dheelitiran ee liiska xiran (PR closed List), kaasoo ku dhisan hal deegaan doorasho.

Guddigu wuxuu daraasad dheer ku sameeyey noocyada doorasho ee matalaadda isu-dheelitiran ee liiska xiran iyo noocyada kale ee kala ah Nidaamka mataleedda isu-dheelitiran ee Liiska Furan (PR Open List) iyo Nidaamka Horreeyaa Guuleysta (FPTP)[80] oo qeexaya in habka doorashooyinka qaranka ee heer federaal uu noqonayo nidaamka matalaadda kuraasta baarlamaanka ee aqlabiyadda ah (majoritarian System) oo ku salaysan tartanka halkii kursiba gaarkii loo dooranayo (Single Member Plurality "SMP").

Dalalka caalamka qaar ka mid ah waxay si toos ah ugu qoraaan dastuuradadooda sida dastuurka dalka South Africa wuxuu xeerinayaa in lagu soo dooranayo xildhibaanada matalaadda isu-dheelitiran ee liiska xiran[81], Dastuurka Dalka Kenya wuxuu xusayaa in doorashadu ay tahay matalaadda isu-dheelitiran[82] sidaas oo kale, waxaa lagu xeeriyey dastuurada dalalka Brazil[83] iyo Spain[84].

### 5.8 Qodobka 51aad: Hay'adaha Sida Tooska ah Loo Dooranayo

Qodobka 51aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa mid cusub oo ka kooban toddoba (7) faqradood, wuxuuna nidaaminayaa hay'adaha dastuuriga ah ee tooska loo dooranayo. Qodobkan waxaa uu xeerinayaa hay'adaha dastuuriga ah ee nidaamkaas doorasho lagu dooranayo:

**Faqradda 1aad** ee qodobkan waxay nidaaminaysaa hay'adaha sida tooska ah loo dooranayo, waxaana laga soo qaatay nuxurka heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran. **Faqradda 2aad** waxayna xeerinaysaa doorashada Golaha Shacabka oo ay dooranayaan dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha, waxaana laga soo qaatay qodobka 3aad oo lala akhriyey qodobka 2aad ee heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran.

**Faqradda 3aad** ee qodobkan waxay xeerinaysaa doorashada Aqalka Sare oo ay dooranayaan dhammaan muwaaddiniinta dawlad goboleed oo buuxiyey shuruudaha codbixiye, waxaana laga soo qaatay qodobka 4aad oo lala akhriyey qodobka 2aad ee heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran.

**Faqradda 4aad** ee qodobkan waxay xeerinaysaa doorashada Madaxweynaha JFS iyo Madaxweyne Ku-xigeenka oo ay ku dooranaayaan dhammaan muwaaddiniinta JFS ee

79 Qodobka 1aad ee Heshiiska Golaha Wadatashiga Qaran, May 2023

80 Aragtidan waxay ku xusan tahay Qodobka 1aad ee Sharciga Doorashooyinka Qaranka, Sharci Lr. 23 ee Febraayo 2020.

81 Qodobka 46aad ee Dastuurka South Africa.

82 Qodobka 9aad ee Dastuurka Kenya

83 Qodobka 45aad ee Dastuurka Brazil

84 Qodobka 68aad ee Dastuurka Spain

buuxiyey shuruudaha codbixiye, waxaana laga soo qaatay qodobka 7aad oo lala akhriyey qodobka 2aad ee heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran.

**Faqradda 5aad** ee qodobkan waxay xeerinaysaa doorashada Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleedka oo ay dooranayaan dhammaan muwaaddiniinta dawlad goboleed oo buuxiyey shuruudaha codbixiye, waxaana laga soo qaatay qodobka 8aad oo lala akhriyey qodobka 2aad ee heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran.

**Faqradda 6aad** ee qodobkan waxay xeerinaysaa doorashada Golaha Wakiilada oo ay dooranayaan dhammaan muwaaddiniinta dawlad goboleed oo buuxiyey shuruudaha codbixiye, waxaana laga soo qaatay qodobka 5aad oo lala akhriyey qodobka 2aad ee heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran.

**Faqradda 7aad** ee qodobkan waxay xeerinaysaa doorashada dawladaha hoose oo ay dooranayaan dhammaan muwaaddiniintooda buuxiyey shuruudaha codbixiye, waxaana laga soo qaatay qodobka 6aad oo lala akhriyey qodobka 2aad ee heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran.

### 5.9 Qodobka 52aad: Muddada Xilhaynta

Qodobka 52aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo ka kooban laba (2) faqradood waa mid cusub oo la soo kordhiyey wuxuuna xeerinayaa muddada xilhaynta ee hay'adaha dastuuriga ah ee tooska loo doorto oo ku xusan qodobka 51aad ee soojeedinta. Nuxurka qodobkan waxaa laga soo qaatay Heshiiska Doorashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran[85].

Faqradda 1aad ee qodobkan waxay nidaaminaysaa muddada xilhaynta hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo dooranayo, wuxuuna qeexaya in 5 sano ay tahay dhammaan muddaada xilhaynta oo la qabanayo hal waqti. Faqraddan waxaa laga soo qaatay nuxurkii heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran.

> Soomaaliya doorashooyinkii xildhibaanada Golaha Shacabka iyo Golayaasha Dawladha Hoose ma dhicin isku mar oo waxaa la qaban jiray laba xilli oo kala duwan, balse dorashooyinkan la qabtay bishii Maarso 1969, waa doorashadii 3-aad uguna dambaysay Soomaliya oo dadweynuhu si toos ah u doorto madaxdiisa iyo wakiilladiisa siyaasadeed, waana doorashadii ugu horreysay oo isku mar la qabto Doorashada xildhibaanada Golaha Shacabka iyo wakiillada Golayaasha Dawladaha Hoose dalka oo dhan, waxaana lagu maamulay Sharciga Lambarkiisu yahya Lr. 13 ee 6 Juun 1968.

85 Qodobada 2aad, 3aad, 4aad, 5aad,6aad iyo 7aad ee Heshiiska Golaha Wadatashiga Qaran uu gaaray 27 Maajo,2023.

### 5.10 Qodobka 53aad: Codbixiyaha

Qodobka 53aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa mid cusub waxa uuna ka koobanyahay afar (4) faqradood, waxaa loo soo kordhiyey qodobkan si loo qeexo:

1) Yaa xaq u leh in uu codeeyo?
2) Diiwaangelinta codbixiyaha.
3) Yaa xaq u laheyn in la diiwaangelinayo?

Faqradda 1aad waxay xaqiijinaysaa xaqa diiwaangelinta muwaaddin kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo oo gaaray 18 sano. GMDHD wuxuu u arkay in muhiim ay tahay in la xuso da'da ugu yar ee qofku ku codeyn karo si loo jiheeyo xeerarka doorashooyinka iyo xisbiyada. Dalalka qaar ayaa ku caddeeya da'da codbixiyaha sida dalka Turkiga[86], Suuririya[87], Tuunisia[88], Kenya[89], Tanzania[90], Sweden[91], South Africa[92] iyo Bangladesh[93]

Faqradda 2aad waxay tilmaamaysaa in dhammaan codbixiyeyaasha diiwaangashan, si siman ay xaq ugu wada leeyihiin dhiibashada codkooda, ayadoo la ilaalinayo rabitaankooda iyo kalsoonidooda. Faqradda 3aad ee qodobkan wuxuu xeerinayaa diiwaanka codbixiyeyaasha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo aad muhiim ugu ah hannaanka doorashooyinka. Sidaas darteed, faqraddani waxay qeexday in Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinku uu diyaarinayo diiwaankaas. Faqradda 4aad ee qoodbkan waxay nidaaminaysaa dadka aan xaqa u lahayn diiwaangalinta.

## MADAXA SADDEXAAD: AXSAABTA SIYAASADEED

GMDHD wuxuu soo kordhiyey madaxan cusub oo lagu nidaaminayo axsaabta siyaasadeed. Asagoo kaashanaya khuburo sharci yaqaanno ah, guddigu wuxuu sameeyey daraasad dheer oo la xiriirta habka xisbiysada siyaasadda, Dastuurka federaalka loogu nidaamin karo.

Dastuurradii uu dalku yeeshay waxay bixiyeen xuquuqaha siyaasiga ah oo ay ka mid tahay yeelasho ama ka-mid-noqoshada ururro siyaasi ahaan u abaabulan.[94] Marka laga reebo, Dastuurka 1979 ee xaddiday xaqa sameysashada xisbiyo siyaasadeed aan ka ahayn halka xisbi ee uu dalku leeyahay.

---

[86] Qodobka 67 ee Dastuurka Turkiga, 1982( Dib-u-eegis lagu sameeyey 2017)
[87] Qodobka 59 ee Dastuurka Suuriya, 2012
[88] Qodobka 53 ee Dastuurka Tuunisiya
[89] Qodobka 260 ee Dastuurka Kenya, 2010
[90] Qodobka 5 ee Dastuurka Tanzania, 1977(Dib-u-eegis lagu sameeyey 2005)
[91] Qodobka 4 ee Dastuurka Sweden,1974(Dib-u-eegis lagu sameeyey 2012)
[92] Qodobka 46 ee Dastuurka Koonfur Afrika, 1996(2012)
[93] Qodobka 122 ee Dastuurka Bangladesh 1972(Dib-u-eegis lagu sameeyey 1986 IYO 2014)
94 Qodobka 12, 25 iyo 28 ee Dastuurka 1960, qodobka 7, 8 iyo 24 ee Dastuurka 1979 (hal xisbi, X.H.K.S), qodobka 18 iyo 22 ee Dastuurka 1990, qodobka 16 ee Dastuurka KMG 2012.

Xeerarka Caalamiga ah ee ay Soomaaliya qaybta ka tahay iyo sharciyada dalka ayaa muwaaddinka siinaya xuquuq siyaasadeed oo ay kamid tahay isu abaabulid urur siyaasadeed ahaan[95].

**Sababaha Xisbiyada Loogu Nidaaminayo Dastuurka**

Waxaa lagama maarmaan ah, in la nidaamiyo dhismaha, jiritaanka, haykalka, awoodaha, howlgalka, dhaqaalaha iyo hufnaanta xisbiyada siyaasadda. Taas oo laysku raacsanyahay, haddana, waxaa muhiimad gaar ah yeelatay, heerka nidaaminta xisbiyada. Dastuurrada dalalka dimuqraadiga ah badankood waxay jideeyaan mabaadi'da saldhig u ah nidaamin habboon ee xisbiyo siyaasadeed waxtar leh, dhowr sababood awgood[96]:

1. Si loo muujiyo loona sugo muhiimadda iyo kaalinta xisbiyada ee nidaamka dawliga ah;
2. Dejin mabaadi'da guud si loo yareeyo jiheynta taban ee sharciyada hoose.
3. Si loo sharciyeeyo xisbiyada loogana hortago ururada halista ah.

Nidaaminta Dastuurka ee xisbiyada siyaasaddu kama dhigna, in aan loo baahnayn sharciyo baarlamaan oo faahfaahiya, ee ujeedku waa in si aan mugdi ku jirin Dastuurku u jiheeyo sharciyada hoose arrimaha asaasiga ah, sameeyaa jiritaan xisbiyo wax-ku-ool ah.

**Qaybaha Nidaaminta Xisbiyada**

Dhinacyada nidaaminta Dastuurka ee xisbiyadu waa arrin aan dalalku adduunka ka-mideysneyn, haseyeeshee dhinacyada ay dastuurrada dimuqraadiga ahi nidaamiyaan xisbiyada waxaa ka mid ah[97]:

1. Mabaadi'da iyo Shuruudaha asaasiga ah ee xisbiyada;
2. Asbaabta mamnuucidda xisbiyada: waxaa muhiim ah in Dastuurku tilmaamo asbaabta haddii ay jiraan xisbi aan la aasaasi karin, ama haddii uu la yimaado xisbiga laga saarayo diiwaanka. Dastuurkii 1960 wuxuu mamnuucayay xisbiyada iyo ururrada siyaasadeed ee ku dhisan hab qarsoodi ah, leh sifo milatari, qaab qabiil u abaabulan.[98] Dastuurkii 1990 wuxuu ku daray "ama doonaya in uu dagaal hubaysan ku qabsado xukunka."[99]
3. Xuquuqda iyo waajibaadka xisbiyada;
4. Heerka iyo hay'adda diiwaangelinaysa xisbiyada. Golaha Wadatashiga Qaranka wuxuu Diseembar 2022 ku heshiiyay in diiwaangelinta xisbiyada iyo maamulka doorashooyinku noqon doonaan heer federaal. Isla GWQ ayaa Maajo 2023 ku heshiiyay in Guddi Madax-bannaan oo ka kooban labada heer ee dowladdu uu maamulo doorashooyinka iyo xisbiyada siyaasadda.

95 Qodobbada 2, 19, 20 ee Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee 1948. Qodobbada 19, 21. 25 iyo 26 ee Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo kuwa Siyaasadda ee 1966 (Soomaaliya ku biirtay 24/01/1990).

96 Ingrid Van Biezen (2012). Constitutionalizing Party Democracy: The Constitutive Codification of Political Parties in Post-war Europe. British Journal of Political Science, 42, pp 187-212 doi: 10.1017/S0007123411000263.

97 Günter Frankenberg, Comparing constitutions: Ideas, ideals, and ideology—toward a layered narrative, International Journal of Constitutional Law, Volume 4, Issue 3, July 2006, Pages 439–459, https://doi.org/10.1093/icon/mol012

98 Qodobka 12 (2) ee Dastuurka 1960.

99 Qodobka 18 (2) ee Dastuurka 1990.

**Taxanaha Xisbiyada Siyaasadeed ee Soomaaliya: 1959-1966**[100]
Qaybtan waxaa lagu soo bandhigayaa taariikhda xisbiyada siyaasadda Soomaaliya ee ka qaybgalay doorashooyinkii 1959, waxaana la xusaya xisbiyada ka qaybgalay doorashada iyo natiijooyinka ay kala heleen.

Doorashadii xubnaha Golaha Sharcidejinta ee la qabtay 8-dii Maarso 1959 (Gobollada Koofurta Dalka Soomaaliya (AFIS))

Jaantuska hoose wuxuu qeexayaa axsaabta ka qaygashay iyo hab ugu kala guuleysteen codadka ansaxay oo ahay 313,760:

| Magaca Xisbiga | Cododka uu helay | U dhiganta % | Tirada Kuraasta |
|---|---|---|---|
| Xisbiga Somali Youth League (SYL) | 237,134 | 75.58% | 83 |
| Xisbiga Somali Independent Constitutional Party (HDMS) | 40,857 | 13.02% | 5 |
| Xisbiga Liberal Somali Youth Party (PLGS) | 35,769 | 11.40% | 2 |

Waxaa xusid mudan in ka qaybgalka doorashooyinka ay qaadaceen axsaabta siyaasadeed ee kala ah (a) Xisbiga Greater Somali League (GSL); iyo (b) Xisbiga the Somali Independent Constitutional Party (HDMS).

Waqooyigii Dalka Soomaaliya Doorashadii xubnaha Golaha Sharcidejinta ee la qabtay 17 Febraayo 1960

Jaantuska hoose wuxuu qeexayaa axsaabta siyaasadeed ee u tartamay soddon iyo saddexda (33) kursi iyo habkii ugu kala guuleysteen codadka ansaxay oo ahay 81,366-

| Magaca Xisbiga | Cododka uu helay | U dhiganta % | Tirada Kuraasta |
|---|---|---|---|
| Xisbiga Somali National League (SNL) | 42,395 | 52.10% | 20 |
| Xisbiga United Somali Party (USP) | 13,350 | 16.41% | 12 |
| Xisbiga National United Front (NUF) | 20,249 | 24.89% | 1 |
| Xisbiga Somali Youth League (SYL) | 4,626 | 5.69% | - |
| Isugeynta Codadka axsaabta kale heleen | 746 | 0.92% | - |

Doorashadii Xubnaha Golaha Sharcidejinta ee la qabtay ee 30 Maarso 1964
Jaantuska hoose wuxuu qeexayaa axsaabta siyaasadeed ee u tartamay 123 kursi iyo habkii ugu kala guuleysteen codadka ansaxay oo ahay 914.069

[100] Taxanaha Doorashooyinka 1959-2017

| Magaca Xisbiga | Cododka uu helay | U dhiganta % | Tirada Kuraasta |
|---|---|---|---|
| Xisbiga Somali Youth League (SYL) | 472,296 | 51.67% | 69 |
| Xisbiga Somali National Congress (SNC) | 186,208 | 20.37% | 22 |
| Xisbiga Somali Democratic Union (SDU) | 95,707 | 10.47% | 15 |
| Xisbiga Somali Independent Constitutional Party | 80,173 | 8.77% | 9 |
| Xisbiga United Somali Party (USP) | 7,552 | 0.83% | 1 |
| Xisbiga Liberal Somali Youth Party (PLGS) | 6,766 | 0.74% | 1 |
| Xisbiga Somali National League (SNL) | 4,354 | 0.48% | 1 |
| Xisbiga Somali African National Union (SANU) | 3,930 | 0.43% | 1 |
| Isugeynta Codadka axsaabta kale heleen | 57,083 | 6.24% | 4 |

Doorashooyinka Golaha Sharcidejinta 4-aad ee Qaranka 26 Maarso 1969:
Xilligii doorashooyinka 1969 waxaa codeeyey dadweyne tiradiisu gaartay 879.554. Haddii tirdan la barbardhigo tirada dadweynihii ka qaybgalay codeynta doorashooyinkii Golayaasha Maamullada Dawladaha Hoose ee 1963 oo ahayd in ka badan 1.300.000 ama aan barbardhigno doorashooyinkii 1964 oo ahaa 913.069 waxaa si marag madoonta ah u muuqanaysa in xilliga 1969 hoos u dhac weyn ka jiray dadweynihii ka qaybgalka codeynta doorashooyinkan. Natiijada doorashooyinka Golaha Sharcidejinta oo muddada xilhayntiisu tahay shan (5) sano waxaa la soo bandhigay 7-da Abriil 1969, waxaana ku dhawaaqay Guddoomiyaha Xafiiska Dhexe ee Doorashooyinka Garsoore G. Marotta-Gigli, oo waagaas ahaa Garsooraha Guddoomiye u aha Maxkamadda Racfaanka Soomaaliya. Waxayna axsaabta siyaasadeed kuraasta u kala heleen sidan:

Jaantuska hoose wuxuu qeexayaa axsaabta siyaasadeed ee u tartamay 123 kursi iyo habkii ugu kala guuleysteen codadkii ansaxay:

| Magaca Xisbiga | Cododka uu helay | U dhiganta % | Tirada Kuraasta |
|---|---|---|---|
| Xisbiga Somali Youth League (SYL) | 260,046 | 33.24% | 73 |
| Xisbiga Somali National Congress (SNC) | 77,339 | 9.89% | 11 |
| Xisbiga Somali Independent Constitutional Party (HDMS) | 27,681 | 3.54% | 8 |
| Xisbiga Somali African National Union (SANU) | 42,006 | 5.37% | 6 |
| Xisbiga Liberal Somali Youth Party (PLGS) | 25,639 | 3.28% | 3 |
| Xisbiga Somali Democratic Union (SDU) | 46,064 | 5.89% | 2 |
| Xisbiga Popular Movement for Democratic Action (PMDA) | 42,629 | 5.45% | 2 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Xisbiga Somali Socialist Party (PSS) | 31,058 | 3.97% | 2 |
| Xisbiga Somali People's Movement Party (PMPS) | 8,531 | 1.09% | 2 |
| Xisbiga Revolutionary Socialist Workers' Party (PRSO) | 16,742 | 2.14% | 1 |
| Xisbiga Somali National Solidarity Party (PSNS) | 12,269 | 1.57% | 1 |
| Xisbiga United Somali Party (USP) | 13,942 | 1.78% | - |
| Isugeynta Codadka axsaabta kale heleen | 178,288 | 22.79% | 12 |

Waxaa ololaha tartanka siyaasadeed ee doorashooyinka ka qaybgalay lixdan iyo afar (64) xisbi siyaasadeed, sidoo kale waxaa xusid mudan in kuraasta 123-da kursi ee mattalaadda Golaha Shacabka u tartamayn 2,214 musharrax, taas oo u dhiganta isku celcelis kursigiiba 18 musharrax ayaa ku loollamay, sidaasna ay axsaabta yaryar ku guulaysteen in ay helaan min hal ama labo kursi. Iskucelcelis halkii kursi ee ka mid ahaa 123, Xildhibaan kasta wuxuu ku fadhiyyey 7.150 muwaadin codkooda. Sidaas oo kale, waxaa xusid mudan dhamaadkii bisha Maajo 1969 in 36 ka mid ahaa xildhibaannadii axsaab kale kuraastooda kusoo guuleystay ay ku biireen xisbiga SYL oo markii hore lahayd 73 kursi, sidaasna ku yeeshay 109 kursi. Waxaa intaa dheer in xisbigii Somali National Congress (SNC) oo lahaa 11 kursi isna isbahaysi buu la yeeshay SYL una kobocday oo yeelatay 120 kursi ka mid ah 123 xubnood uu Goluhu ka koobnaa. Waxaa kaloo muhiim ah in fiiro gaar ah loo yeesho casharka laga bartay sida ay u dhaqmeen xildhibaanadii lagu soo doortay axsaabtaas tirade badan. Sida uu xeeriyey qodobka 9-aad ee Sharciga cusubaa lambarkiisuna ahaa Lr. 13, 6 Juun 1968: nidaamka kuraasta loogu kala badinaayo waxaa laga dhigay in tirada codadka ansaxa ah ee degmada ku codeeyey loo qaybiyo tirada kuraasta ay degmadaas ku leedahay Golaha Shacabka wixii ka soo baxa ayaa u dhigma hal kursi. Saa daraadeed Xisbigii hela tiradii ka soo baxday qaybintaas keliya ayaa kursi ama kuraas heli kara. Xukuumaddu nidaamkan cusub waxay ku sheegtay in looga gol leeyahay si looga hortago laguna yareeyo axzaabta siyaasadeed yaryar ee faraha badan oo samaysma doorashooyinka ka hor hadana haddiiba baaba'a doorashada ka dib, taas oo keenta si joogta ah xasilooni xumi siyaasadeed.

**Khibradaha Somaliland iyo Puntland**

Somaliland iyo Puntland waxay tusaale u yihiin xadayn tirada xisbiyada markiiba jiri kara. Qodobka 9aad ee Dastuurka Somaliland wuxuu dhigayaa in nidaam siyaasadeedkoodu yahay "dimuqraadiyad iyo hannaanka xisbiyada badan" hase yeeshee wuxuu xaddidayaa tirada xisbiyada siyaasadeed inaysan "ka badnaan karin saddex xisbi" markiiba.[101] Qodobka 4aad ee Xeerka Nidaamka Xisbiyada, Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda ayaa muddada jiritaanka xaddiday "mudada liisanka ee xisbi qaran waa toban (10) sano oo ka bilaabma taariikhda liisanka la siiyay".[102]

Puntland, si ka duwan Somaliland, ayay u xaddiday xisbiysada siyaasadda. Qodobka 46aad ee Dastuurka Puntland wuxuu cayimay saddexda urur siysaasadeed ee ugu codka badan doorashooyinka degmooyinku in ay noqonayaa xisbiyada siyaasadeed ee rasmiga ah laba muddo xileed.

GWQ asagoo ka sababeeyey xasiloonida siyaasadeed ee dalka iyo casharadii laga bartay taxanihii doorashoooyinka soomaaliya wuxuu soojeediyey xaddidaada xisbiyada siyaasadeed ee heer qaran.

## 5.11 Qodobka 54aad: Dowrka Xisbiyada Siyaasadeed

Qodobka 54aad ee qabyoqoraalka wax-kabeddelka Dastuurka waa qodob cusub oo la soo kordhiyey, kana kooban laba (2) faqradood. Nuxurka qodobkan waxaa laga soo qaatay heshiiska Doorashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran oo uu gaaray 2023. Faqradda 1aad iyo 2aad ee qodobkan waxaa la soojeediyay in qodobkan lagu daro, si loo sugo dowrka axsaabta siyaasadeed iyo in la muujiyo in ay yihiin tiirarka nolosha siyaasadda dalka.

## 5.12 Qodobka 55aad: Shuruudaha Xisbiyad Siyaasadeed

Qodobka 56aad ee qabyo-qoraalka wax-kabeddelka Dastuurka oo ka kooban laba (2) faqradood, xeeriayana shuruudaha asxaabta siyaasadda waxaa loo soo kordhiyey in la dejiyo nidaam guud dastuureed oo lagu nidaaminayo arrimaha axsaabta siyaasadeed. Tani waxay lagama maarmaan u tahay axsaab siyaasadeed oo mustaqbalka la filaayo in ay ka hirgalaan dalka in doorashooyinka lagu maamulo. Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegidda iyo Hirgelinta Dastuurka waxaa uu u arkay in ay lagama marmaan tahay in asxaabta siyaasadeed lagu dhaqo halbeegyo dastuuri ah oo qeexaya shuruudaha. Faqradda 2aad ee qodobkan waxay xeerinaysaa dhammaaan xisbiyada ka mamnuuca dalka gudihiisa.

Iyada oo la tixgelinnayo Dastuurkii 1960kii si looga hortago ururrada qarsoodiga ah oo dhibka u geysan kara amniga dalka iyo danta qaranka, qodobka 26aad, faqradda 3aad

[101] Qodobka 9aad, Dastuurka Somaliland ee 2000.
[102] Qodobka 4aad, Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda ee Lr.14/2000 oo wax laga beddelay lr.14/2011.

ee Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya[103] ee 1960 ayaa mamnuucaysay ururrada qarsoodiga ah ama kuwa leh dabeecadda militariga. Dalal badan ayaa dastuurradooda si toos ama si dadban ugu mamnuucay ururrada qarsoodiga ah ama kuwa wax u dhimaya amniga iyo danta dalka. Tusaale Qodobka 75aad ee Dastuurka Masar[104] wuxuu mamnuucayaa yagleelidda ama sii wadidda ururrada ama hay'adaha aan dawliga ahayn oo hawlahooda yihiin qarsoodi oo leh dabeecad ciidan ama ciidan u eke. Qodobka 38aad, faqradda 4aad ee Dastuurka Nigeria[105] ayaa xeerinaysa in aan cidna xaq u lahayn in ay samayso ama qayb ka qaadato hawlaha ururrada qarsoodida ah.

### 5.13 Qodobka 56aad: Tartanka Xisbiyada Siyaasadeed

Qodobka 56aad ee qabyoqoraalka wax-kabeddelka Dastuurka waa qodob cusub oo la soo kordhiyey. Faqradda 1aad waxaa laga soo qaatay heshiiska Doorashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran uu gaaray 2023. Qodobkan oo ka kooban laba (2) faqradood, faqradda 1aad waxaa lagu nidaamiyey ururrada siyaasadeed ee ka qayb gali kara tartanka doorashooyinka goleyaasha deegaanka, si waafaqsan qodobka 6aad ee Heshiiska GWQ.

Faqradda 2aad, si waafaqsan Qod.3,5 iyo 1aad ee heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran, wuxuu nidaaminayaa tirada ururrada siyaasadeed ee ka qayb-gali kara doorashada Golaha Shacabka, Aqalka Sare, xilka Xafiiska Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kuraasta golaha wakiilada, xilka Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye ku xigeenka ee dawlad goboleed kasta.

## MADAXA AFARAAD: MAAMULKA DOORASHOOYINKA

### 5.14 Qodobka 57aad: Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

Qodobka 57aad ee qabyoqoraalka wax-kabeddelka Dastuurka waa mid cusub oo la soo kordhiyey wuxuu dhisayaa Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka, waxaana laga soo qaatay qodobka 12aad ee heshiiska Doorashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran oo uu gaaray 2023.

### 5.15 Qodobka 58aad: Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

Qodobka 58aad ee qabyo-qoraalka wax-kabeddelka Dastuurka waxaa laga soo raray Qodobka 111E iyo Qodobka 111G ee Asalka Dastuurka KMG ah. Waxaana lagu sameeyey siiqayn iyo kaabid xarfaha qaarkood. Ujeeddada halkana loogu soo raray waa in dhammaan qodobada doorashooyinka la xiriira halkaan la keeno, oo ay ugu horreyso maamulka doorashooyinka uu mas'uul ka yahay Guddigu.

---

[103] Qodobka 26aad, faqradda 3aad ee Dastuurka Soomaaliya 1960.
[104] Qodobka 75aad ee Dastuurka Masar ee 2014, wax-kabeddel lagu sameeyey 2019.
[105] Qodobka 38aad, faqradda 4aad ee Dastuurka Nigeria.

### 5.16 Qodobka 59aad: Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

Qodobka 59aad ee qabyoqoraalka wax-kabeddelka Dastuurka waa mid cusub oo la soo kordhiyey oo qayb ka ah qodobbada nidaaminaya doorashooyinka iyo axsaabta siyaasadda, wuxuu dhisayaa Guddiga Madaxa-banaan ee Doorashooyinka, waxaana laga soo qaatay qodobka 12aad ee heshiiska Doorashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran uu gaaray 2023. Faqradda 2aad ee qodobkan waxay nimaadinaysaa Guddoomiyaha Guddiga.

### 5.17 Qodobka 60aad: Shuruudaha Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

Qodobka 61aad ee qabyo-qoraalka wax-kabeddelka Dastuurka waa qodob cusub oo la soo kordhiyey oo xeerinaya shuruudaha Guddiga Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

### 5.18 Qodobka 61aad: Muddada Xilhaynta Xubnaha Guddiga

Qodobka 61aad ee qabyoqoraalka wax-kabeddelka Dastuurka waa qodob cusub oo la soo kordhiyey si la mid ah dhammaan qodobbada cutubka oo xeerinaya arrimaha doorashada dalka. Qodobkan wuxuu si gooni ah u xeerinayaa muddada xilhaynta Guddiga Madaxabannaa ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha iyo qaabka loo magacaabayo iyada oo la tixgelinayo xilhaynta, lana hubinayo in aan dhammaan xubnaha Guddiga isku mar xilku ka dhammaan.

### 5.19 Qodobka 62aad: Xil-waayidda Xubnaha Guddiga

Qodobka 62aad ee qabyoqoraalka wax-kabeddelka Dastuurka waa qodob cusub oo la soo kordhiyey, wuxuu nidaamineyaa asbaabta xubnaha guddigu ay xilkooda ku waayi karaan.

### 5.20 Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 4aad

Cutubka 4aad ee qabyo-qoraalka Dastuurka wuxuu ka koobanyahay 14 qodob oo saddex iyo toban kamid ah cusubyihiin. Hal qodob ee asalka Dastuurka waa la tiray. Golaha Wadatashgia Qaran wuxuu heshiis ka gaaray arrimaha doorashooyinka iyo xisbiyada.

**Jaantuska 4aad: Natiijada wax-kabeddelka Cutubka 4aad**

Jaantuskan hoose wuxuu muuqalinayaa: (a) qodobbada iyo faqradaha la soo kordhiyey; (b) qodobbada iyo faqradaha la tiray; (c) qodobbada iyo farqadaha toosin iyo siiqayn lagu sameeyey; iyo (d) qodobbada ama faqradaha sidoodii loo qaatay.

## JAANTUSKA 4AAD



ICRIC